

,
comma
;
semicolon
:
colon
.
fullstop
!
exclamation mark
?
question mark
‘
apostrophe
‘ ’
quotes
“ ”
double quotes
-
hyphen
—
dash
/
stroke or slash
( )
parentheses or round brackets
[ ]
square brackets
. . .
ellipsis
*
asterix

(1) GOGOLDHIG:

- **Qeexidda Iyo Waxtarka Astaamaynta Qoraalka**

Weligaa ma u fiirsatay dadku marka ay hadlayaan? Sidee ayaa ay u hadlaan? Ma sidii foosto la dhaaminayo oo biyaha si degdeg ah loogu shubayo oo kale ayaa ay u hadlaan? Mise hadalkooda waa ay qaabeeyaan, waa na ay qurxiyaan? Adigu, abuur ahaan, sidee ayaa aad u hadashaa, jeerka aad doonayso hadalkaaga in aad deeqsiiso qof ama ummad?

Caqligal weeye dadka qayb ka mid ahi in ay iska hadlaan uun—oo hadalkooda aan wax ba laga garan; sababtu iyada oo ay tahay sida loo hadlo oo aan ay garanayn. Shacabku kuwaa oo kale ma jecla in ay dhegaystaan, waqtigooda na wax ba ka ma siiyaan. Illow se waxa jira kuwo kale oo ay jecel yihiin in ay dhegaystaan, waqtigooda na wax badan ka siiyaan. Kuwaasi, hadda ba, waa kuwee?

Waa kuwa jeerka ay hadlayaan si tartiibsan oo farshaxamaysan u hadla. Hadalkooda waxa ay u yeelaan xiise iyo dhadhan badan, kol kale fikir iyo gorfayn badan. Iyaga oo qaabaynaya mise na qurxinaya hadalkooda, ayaa ay meelaha qaar joogsadaan, meelaha qaar hakadaan, meelaha qaar

iftiimiyaan, meelaha qaar xoojiyaan, meelaha qaar amakaagaan, meelaha qaar shakkiyaan—oo meelaha qaar kala saaraan hadalkooda iyo xigashadooda. Intaa waxa u raaca, codkooda oo ay bedbeddelaan: mar ay ka dhigaan mid sare iyo mar ay ka dhigaan mid hoose, iyo xattaa mar ay ka dhigaan mid isku dhex jira. Calaamadahaa badan ee kala cayncaynka ah sababta qudh ah ee loo adeegsanayo, hadalka socda in aan lagu caajisin ka sakow, macnihiisa iyo ujeeddadiisa saani in loo fahmo weeye. Maanta oo dhan wixii aad sheegaysay nuxurkii iyo, weli ba, dabuubtii aad ka lahayd haddiii dadku garan waayaan, tacab khasaar kuu dhiman miyaa aad garanaysaa?!

Kaasi waa hadalkii. Qoraalka aynnu u nimaadno. Sababta keli ah ee qoraalku ugu baahday astaamayn waa isla sababta keli ah ee hadalku ugu baahday astaamayn. Qudh ah waa waxa aad rabto in aad sheegto si qumman oo habaysan in loo fahmo macnihiisa iyo ujeeddadiisa. Farshaxannimada la sheegsheegaa na sawirrada iyo xogaha ku jira caqligaaga waa in aad si fudud u soo saartid, dabadeed waa in aad si fudud dadka caqliyadooda ugu shubtid. Qoraalku isaga ayaa uga baahi badan hadalka adeegsiga astaamaha kala duduwan. Waayo? Qofku marka uu na la hadlayo, dhammaan siyaalooyin kala geddisan waxa uu u isticmaalayaa xubnaha jidhkiisa, xubin kastaa na waxa ay lee dahay dareen (ama dareemo). Dareenkaa aan helaynno ayaa naga kaalmaynaya wax badan in aan sii fahamno, wax badan oo kale na isla kolkooda in aan fahamno.

Laakiin qofku marka uu wax noo qorayo, dareenkaa sida tooska ah ee muuqata aan u helaynno, xaqiiqdii, waa uu ka maqan yahay. Waa na sababta ay u dhacdo, qoraal kaftan looga jeeday in la moodo run, ama mid run looga jeeday in la moodo kaftan. Ama hadal maad looga dan lahaa in laga xanaaqo—ama caksigeeda.

Sidaa darteed, astaamaynta qoraalka si fiican u barashadooda iyo si habboon u adeegsigooda ma aha uun shay wanaagsan, bal se waa shay waajib ku ah qof kasta oo doonaya in uu wax qoro. Qoriga Aakeega ah, xabbadaha ku jira si wanaagsan u rididdooda iyo qoriga laftirkiisa si xirfadaysan u qabsashadiisa, saw ku ma aha askariga waajib? Qoraagu na waa tabtaa oo kale. Qoraaga aan wax ba ka aqoon cilmiga astaamaynta qoraalka, ama astaan kasta aan dhigi karin booskeeda saxda ah, waxa uu la mid yahay askari aan wax ba ka aqoon cilmiga rididdа qoriga, oo xabbad kasta aan ku dili karin qofkeeda cadowga ah.

Astaamaynta qoraalku, qeexid ahaan, calaamado kala muuqaal iyo hawl duwan weeye, kuwaa oo loo adeegsado qoraalka, qoraalku si uu u noqdo mid si wacan loo akhrin karo erayadiisa, dhan kale na si uu u noqdo mid si cad loo fahmi karo ujeeddadiisa. Astaan la muuqaal ah astaan kale ma ay jirto. Tusaale ahaan, astaanta joogsiga (.) waa mid ka muuqaal duwan astaanta joogsihakadka (;). Sida oo kale, astaan la shaqo ah astaan kale ma ay jirto. Mid wali ba waxa ay lee dahay shaqooyinkeeda gaarka ah. Meelayow hawl isku mid ah ay ka qabtaan waa ay jiraan—waa se wax naadir ah. Giddigood ujeeddada

midka ah ee ay u adeegayaan, hadalka qoran akhriskiisa in ay fudaydiyaan weeye iyo, tabta oo kale, macnihiisa in ay caddeeyaan. Waa ba Intaa uun!

Muhiimadda astaamaynta qoraalka waa mid aynnu si dadban u soo sheegnay. Ruux kasta oo qoraa ahi waxa uu aad u jecel yahay in la wada fahmo hadalkiisa—oo weli ba la wada fahmo macnihii iyo ujeeddadii uu lahaa. Sidaa haddii ay dhici waydo, qawmamo badan ayaa uu dareemayaa; taa oo soo noqnoqota na suuragal waxa ah qalinka iyo qoraalka ba in uu iska daayo. Hadda ba, waaqiciyyan, calaamadaha qoraalku waa kuwa kaa ilaalinaya qawmamadaa ku soo waajihi lahayd—ee kuu ba diiddi lahayd waxqorista. Saw markaa ma aha muhiiim? Waxa aan ujeedaa: Saw markaa ma leh mudnaan ama waxtar badan? Waxa aan filayaa warcelintu in ay tahay, "HAA!"

Qormadaydan aan ku soo afmeero sheeko dhacday waa hore oo inoo sheegaysa waxtarka calaamadaha qoraalka. Siyaabo badan ayaa loo wariyaa, se qaab guud ayaa aan u warinayaa anigu. Magaceeda waxa la dhahaa: "Hakad Waxa Uu Dili Karaa Qof!"

Magaalo ka mid ah magaalooyinka dunida ayaa waxa ka baxsaday nin aad loo doondoonayay oo halis ahaa. Dabadeed, kooxo badan oo ciidan ah ayaa hal mar loo wada diray raadinta iyo sooqabashada maxbuuskaa daran. Saraakiisha guud ee ciidanku mar ba waxa ay raacayeen cutub gaar ah. Doondoonistii iyada oo lagu jiro, ayaa cutub aan ay la soconin saraakiishii sarsare,

waxa ay arkeen oo qabteen shakhsigii cadowga ahaa ee la baadigoobayay. Bacdayn, arrintii waxa ay gaadhay madaxdii sare, hoggaamiyihii ciidanku na waxa uu kornaylkii cutubka u soo qoray warqad ay ku qornayd, "Kill him, not wait for me!"—oo af Soomaali ku noqonaysa: "Dila, aniga ha i sugina!" Laakiin, dhab ahaantii, isagu ma uu doonayn sidaa. Ujeeddadiisu waxa ay ahayd in uu qoro sidan, "Kill him not, wait for me!"—oo af Soomaali ku noqonaysa: "Ha dilina, aniga i suga!" Kornaylkii cutubku markii ay soo gaadhay ee uu akhriyay warqadda, amarkii ayaa uu u hoggaansamay—oo ninkii cadowga ahaa ayaa uu isla ilbidhiqsigii ba amray in la dilo, waa na la dilay. Ninkii dhimay; hakad ayaa galaaftay aan la dhigin booskiisii saxda ahaa!

Ma arkaysaan sida wax ay u dhaceen? Hal calaamad oo aan loo adeegsan si fiican, oo la dhigay meel gef ah, ayaa qof dhan oo nool galaafatay noloshiisii oo dhan—oo saartay "baska aakhiro!" Ka warrama haddii loo adeegsan lahaa si qumman? Xaqiiqadu waxa ay tahay shakhsigaasi ma uu dhinteen, saw ma aha? Hadda ba, astaan keli ah haddii ay qof dili karto, ama noolayn karto, ma waxtar intaa ka weyn baa aad garanaysaa adigu oo mawduucani uu lee yahay? Waxa aan u malaynayaa jawaabtu waa, "MAYA!"

Jaalle, hadda ba, astaamaynta qoraalka u baro ruux nool oo Ilaahay karaameeyay sabab in aad aan u noqonin dilkiisa—oo dunida korkeeda aad aan ku noqonin "gacankudhiigle weyn!" Gacankudhiigle wax ku dilay calaamad!!!

■ ■ ■

(2) XEER:

- **Xeerarka Waaweynaynta Xuruufaha**

Haddii aad doonayso in aad qorto qoraal rasmi ah oo akadeemi ah, waaweynaynta xuruufaha gooraha la isticmaalo iyo siyaalooyinka loo isticmaalo in aad barataa, waa kugu waajib. Jaalle, tani waa xirfad aad u baahan tahay!

Qodobkani, berigii hore, ka ma uu san mid ahayn, lagu ma na dhex daraasayn jirin, cilmiga qoran ee "astaamaynta qoraalka." Bal se muhiimaddiisa oo aad loo ogaaday ayaa sababtay in lagu dhex daro—loo na aqoonsado ladhkan: Furaha Astaamaynta Qoraalka. Maadaama uu yahay fure, weli ba fure wanaagsan, waa sababta aynnu u doorannay casharro badan oo ku saabsan cilmigan aynnu ku dhex jirno in aan uga dhigno "bilaw."

Xeerar badan ayaa la qoraa, ama qoran. Badankood ku ma kala duwana sidaa wax u sii weyn. Aniga oo jecel maaddadan in loo fahmo si aad u heer sarraysa, xeerarka wixii is leh waxa aan ka dhigayaa "hal xeer"—si aan loogu wareerin badnaanshahooda. Saddexdan xeer ee soo socda, ruuxii si wanaagsan u

fahma, dhab ahaantii waa uu fahmay qodobkan. Aynnu, hadda ba, gude galno. (Erayada aan soo gaabsaday ee "T.A." waxa aan uga jeedaa: tusaale ahaan.)

■ Xeerka 1aad = Bilawga wax kasta ba

Qoraal kasta oo la qoro waxa uu ka bilawdaa eray. Eraygaa xarafkiisa ugu horreeya waa in la weyneeyaa.

T.A.: Dadkeennu waxa ay isku khaldaan qabiil iyo qabyaalad.

Erayga "dadkeennu" xarafkiisa kowaad oo ah "d" waxa aynnu ka dhignay xaraf weyn. Sabab? Hawraartaa aan qornay eraygeeda ugu horreeya ayaa uu yahay xarafkiisa ugu horreeya.

Mar kale: Waxa aynnu og nahay joogsi dabadii waxa bilawda jumlad cusub, saw ma aha? Jumladdaa cusub ee bilaabantay, eraygeeda ugu horreeya xarafkiisa ugu horreeya waa in la weyneeyaa.

T.A.: Samiik waxa uu aaminsan yahay ku na qanacsan yahay fikirka Soomaaliweyn. Had iyo jeer waxa uu ku doodaa fikirkaasi in uu yahay ka keli ah ee Soomaalida u soo celin kara sharaftii ay ku lahayd adduunyada. Waa uu ku ad'adag yahay oo waxa uu rumaysan yahay in uu yahay fikir socon kara haddii si xor ah loo fikiro.

Xarfaha “h” iyo “w” ayaa aan mid kasta ba ka dhignay xaraf weyn. Sabab? Mid kasta ba bilaw waxa uu u ahaa jumlad cusub oo bilaabantay joogsi dabadii.

Mar saddexaad: Hadalladeenna si loo rumaysto waxa aynnu dad aqoonyahanno ah ka soo xigannaa hadallo dhabgal ah, saw ma aha? Hadda ba, xigasho kasta oo aynnu qoraynno, erayadeedu ama ha yaraadaan ama ha bataan e, eraygeeda kowaad xarafkiisa kowaad waa in la weyneeyaa.

T.A.: Wadaad Cabdiraxmaan S. Bashiir waxa uu yidhi, “Ma aha eedaheenna in aan ku shaambadaynno dad kale. Annagu waa in aan qirnaa wax kasta oo dhacay in aan ka nahay mas’uul!”

Erayga “ma” xarafkiisa kowaad ee “m” waa la weyneeyay. Sabab? Hadalka aan ka soo xigannay aqoonyahan Cabdiraxmaan ayaa uu eraygiisa kowaad yahay xarafkiisa kowaad.

Sookoobid: Bilaw kasta ba oo la samaynayo, ha noqoto qoraal cusub, ama ha noqoto jumlad cusub, ama ha noqoto xigasho cusub, mid kasta ba eraygeeda kowaad xarafkiisa kowaad waa in la weyneeyaa. Xeerkani waxa uu na barayaa waa ba intaa uun! Ma fahamtay?

■ Xeerka 2aad = Magacyada gaarka ah

Goorma ayaa uu noqon karaa magacu mid gaar ah? Waa su’aal ay tahay in aynnu is wayddiinno.

Jawaabta oo koobani waa marka sifadu ay noqoto mid ay iska lee dahay cid, meel, ama arrin gaar ah.

Bani'aadamku mid wal ba waxa uu lee yahay magac gaar ah, saw ma aha? Sidaa oo kale, degaan wal ba waxa uu lee yahay magac gaar ah. Dal wal ba waxa uu lee yahay magac gaar ah. Meel wal ba waxa ay lee dahay magac gaar ah. Maalin wal ba waxa ay lee dahay magac gaar ah. Bil wal ba waxa ay lee dahay magac gaar ah. Bulsho wal ba waxa ay lee dahay magac gaar ah. Xarun wal ba waxa ay lee dahay magac gaar ah. Qaarad wal ba waxa ay lee dahay magac gaar ah. Dhacdo wal ba waxa ay lee dahay magac gaar ah. Oo diin wal ba waxa ay lee dahay magac gaar ah. Intaa miyaa aan isku diiddan nahay? Magacaa ayaa ku wal ba kaga soocan yahay kuwo kale. Hadda ba, magac kasta oo gaar ah xarafkiisa kowaad waa in la weyneeyaa.

T.A.: Cubayd (magac qofeed); Yagoori (magac degaaneed); Soomaaliya (magac daleed); Baar Hargeysa (magac meeleed); Arbaco (magac maalineed); Jeenaweri (magac bileed); Kiinyaati (magac bulsheed); Jaamacadda Muqdisho (magac xaruneed); Afrika (magac qaaradeed); Dagaalkii Kowaad ee Adduunka (magac dhacdeed); Muslim (magac diineed).

Mar kale: Waxsoosaar wal ba (waxsoosaarkaasi ha noqdo buug, ama riwaayad, ama filim, ama qoraal, ama maanso, ama wax kale ba e) maadaama uu lee yahay qiime badan, iyo maadaama mid kasta ba uu lee

yahay magac gaar ah, eraygiisa kowaad xarafkiisa kowaad waa in la weyneeyaa. Xattaa haddii magacaasi uu ka kooban yahay dhawr eray, eray wal ba xarafkiisa kowaad waa in la weyneeyaa.

T.A.: Aanadii Negeeye (magac buugeed); Xuskii Jacaylka (magac riwaayadeed); Captain Philips (magac filimeed); Qabiil Iyo Qabyaalad: Ma Isku Mid Baa . . ?! (magac qoraaleed); Dabahuwan (magac maanseed).

Mar saddexaad: Waxa jira magacyo si gaar ah u muujiya "tilmaan darajo." Kuwaa, eraygooda kowaad xarafkiisa kowaad waa in la weyneeyaa.

T.A.: Garoowe waxa isku arkay oo kulammo badan wada qaatay Dr. Cabdiweli M. C. Gaas iyo Madaxweyne Farmaajo.

Xarafyada "d" iyo "m" mid kasta ba waxa aan ka dhignay xaraf weyn. Sabab? Mid kasta ba eraygiisu waxa uu tilmaamayaa darajo ay adag tahay in la gaadho. Laakiin goorta erayadaa iyo kuwa la midka ah xarafkooda kowaad la weynaynayo, waa goorta ay ka horreeyaan qofka ay darajaynayaan magaciisa. Haddii ay yihiin keligood, la ma weynaynayo, sida ku cad tusaalahan hoose.

T.A.: Anigu maalin uun waxa aan noqon doonaa madaxweyne (la ma odhan: Madaxweyne!).

Mar afaraad: Shirkad kasta iyo urur kasta waxa ay lee dahay magac gaar ah. Magacaasi haddii aannu ahayn xuruuf mid wal ba loo soo gaagaabiyay erayo, keli ah eray wal ba xarafkisa kowaad waa in la weyneeyaa.

T.A.: Shirkadda Golis waa mid ka mid ah shirkadaha dhanka isgaadhsiinta ee sannad wal ba hela lacago aad u badan.

Magacaasi haddii uu ka kooban yahay xuruuf iyada oo xaraf wali ba u taagan yahay eray, xaraf wal ba waa in la weyneeyaa, dabadeed joogsi waa in la daba dhigaa.

T.A.: Ururka I. G. A. D. waxa uu Soomaaliya ka dhex wadaa labo mashruuc oo aad u ah muhiim.

Waxa jira xuruuf xaraf wali ba u taagan yahay eray oo aan shardi ahayn in uu noqdo magac shirkad, ama magac urur. Kuwaa waxa ka mid ah G. M. T. (Greenwich Mean Time), iyo G. D. P. (Gross Domestic Product). Magac wal ba oo ka kooban xuruuf xaraf wali ba u taagan yahay eray dhammaystiran, xaraf wal ba marka hore waa in aad weynaysaa, marka dambe na joogsi waa in aad daba dhigtaa.

Mar shanaad: Waxa jira maalmo leh xus gaar ah—ama dheh dabbaaldeg gaar ah. Maalmahaa maadaama aad loo weyneeyo, xarafkooda kowaad waa in la weyneeyaa.

T.A.: Masiixiyiintu giddigood waxa ay u dabbaaldegayaan Maalinta Kirismaska. (Maalinta Kirismaska: Waa maalin caqiido oo dadka Masiixiyiinta ahi ay sameeyaan fantasyo aad u waaweyn!)

Maalmahaa waxa ka mid ah Maalinta Jacaylka Adduunka (iyo kuwa la nooca ah), iyo Maalinta Dambe (oo laga wado: qiyaamaha, iyo kuwa la nooca ah).

Sookoobid: Meel kasta oo aad ku aragto magac gaar ah (magacaasi waxa uu doono ha noqdo e), ama tilmaan gaar ah (tilmaantaasi waxa ay doonto ha noqoto e), ama xus gaar ah (xuskaasi waxa uu doono ha noqdo e), eray wal ba xarafkiisa kowaad waa in aad weynaysaa. Haddii ay jiraan xuruufo xaraf wali ba u taagan yahay eray buuxa na, waa in aad xuruuftaa wada weynaysaa oo dabadeed joogsi ku daba qabataa mid wal ba. Xeerkani waxa uu na barayaa waa ba intaa uun! Ma fahamtay?

■ Xeerka 3aad = Xaalado kooban

Waxa jira xaalado kooban oo si gaar ah loo barto. Labadan soo socda weeye.

Xaaladda kowaad: Waxa jira magacyo xushmeed. Sababta xarafkooda kowaad loo weyneeyo keli ah waa mudnaan ama xushmad ay lee yihiin. Magacyadaa qaaliga ah waxa ka mid ah magacyada badan ee ummad wali ba ay Ilaahay u taqaanno (innagu,

Soomaali ahaan, aynnu dhahno "Eebbe"), magacyada asalaynka (Qur'aanka iyo Sunnada) ku soo arooray ee Ilaahay iyo arrimaha la xidhiidha loo nisbaynayo, iyo wixii kale oo loo hayo maamuus iyo mudnaan weyn.

T.A.: Waajib waxa ku ah Muslimiinta in ay ka cabsoodaan Eebbe.

T.A: Maalin wal ba waxa aan akhriyaa jus Qur'aan ah.

T.A.: Qof kasta oo suubban waxa uu jecel yahay Suubbanaheenna.

Erayada "eebbe," "qur'aan," iyo "suubbanaheenna" mid kasta ba xarafkiisa kowaad waa la weyneeyay. Sabab? Waa xushmad iyo qaddarin buuxda oo ay lee yihiin.

Mar kale: Waalidkeen, dhammaanteen waa aan jecel nahay, saw ma aha? Kolka aynnu qoraynno magacyadooda waa in aan ka horraysiinno tilmaantooda waalidnimo—tilmaantaanna xarafkeeda kowaad waa in aan weynaynno.

T.A.: Berrito waxa aan warqad u qori doonaa Hooyo Mako.

T.A: Daqiiqado ka hor waxa i la soo hadlay Aabbe Cabdirisaaq.

T.A.: Bilooyin ka dib waxa aan booqan doonaa Eeddo Canab.

Xaaladda labaad: Waxa jira marmar aynnu xoog u dhawaaqno. Kolkol hadalka si qabow oo qunyar ah ayaa loo dhahaa. Kolkol kale na si kulul oo qaylo ah. Hadda ba, mar kasta oo hadalka kor loo qaado oo qaylo badan ama cod sare la maqlayo, hadalka oo dhan waa in lagu qoraa xuruuf wada waaweyn. Sidaa oo keli ah ayaa lagu garan karaa hadalkaa qoran markii lagu hadlayay, si xoog ah oo kor ah in loogu hadlay.

T.A.: NAAYAA, MAXAA HALKAN KU KEENAY?

T.A.: WAARYAA, MAXAAD TUUGGA U QABAN WAYDAY?

T.A.: FADHIGA KA KACAAY!!!

Sookoobid: Magac kasta oo leh xushmad iyo xurmad aad u weyn, eraygiisa kowaad xarafkiisa kowaad waa in aad weynaysaa. Hadal kasta oo markii la odhanayay codka kor loo qaaday na, erayadiisa oo dhan xarafxaraf waa in aad u weynaysaa. Xeerkani waxa uu na barayaa waa ba intaa uun! Ma fahamtay?

. . .

Ugu dambayntii, qormadeennan wacan aynnu ku soo afmeerno hal arrin oo leh mudaanteeda. Waxa jira mar eray dhan xuruuftiisa la wada weyneeyo iyada oo

cod ahaan kor loo qaadin, bal se la doonayo dadku markii ba in ay arkaan, maskaxdu na markii ba in ay xifdiso oo gadaal ka xusuusato. Keli ah waa kol la doonayo arrin loo dan lee yahay akhristaha si fiican in loo fahamsiiyo. Tusaalahan hoose ayaa aad ku garan doontaa iftiimintan loo baahan yahay.

T.A.: Weligeen ka ma adkaanaynno ALSHABAAB inta innagu aynnu is QABYAALADAYNAYNNO.

Sababta labada eray loo weyneeyay, ee la doonayo indhaheennu isla markii ba in ay arkaan, waa in hawraartu ay samaynayso macne aan inoo muuqan—se la doonayo in aynnu la soo baxno. Waa macne ah: Xilliga aynnu ka xorownno qabyaalad, waa xilliga aynnu iska celin karno al-Shabaab. (Qabyaaladdu inta ay jirto, al-Shabaab na waa ay jiraysaa!)

Saddexdaa xeer ee aynnu soo aragnay ayaa sababa xaraf ama xuruufo in la weyneeyo. Waxa aan u malaynayaa xeer wal ba in aan sharxay, iyo qodob wal ba in aan ka bixiyay tusaalayaal wanaagsan. Maanta ka dib waa in aan ku dhaqannaa xeerarkaa oo siinnaa mudnaan badan.

■ ■ ■

(3) Sumadda seddexaad:

- **Isticmaalka Saxsan Ee Joogsiga (.)**

Joogsigu, calaamadda ugu caansan calaamadaha qoraalka weeye. Kol kale, sida la isku raacsan yahay, astaanta ugu fudud adeegsi ahaan weeye jeerka la barbardhigo astaamaha kale. Faa'iidadeeda ugu weyn waa "joogsi dhammaystiran"—joogsigaa oo akhristaha siinaya kansho uu ku nafiso, ku na neefsado. Giddigeen waxa aynnu og nahay aadamuhu in uu yahay neefkunoole. Neefta ku jirta haddii aannu saarin, neef kale na qaadanin, hubaal waxa ah in uu geeryoon doono. Sidaa darteed, joogsigu, qofka nool waxa ay ka dhawrtaa si dhib yar in uu u dhinto! (Haddii aad qof u qorto bog dhan oo bilaa joogsi ah,

oo dabadeed qofkii uu dhinto, gacankudhiigle wax ku dilay joogsi la'aan ayaa aad noqonaysaa! Is jir!)

Astaantani horgal waxa ay u tahay labo astaamood oo kale oo hawraarta xaggeeda dambe gala. Labadaasi na waxa ay kala yihiin astaanta wayddiinta (?), iyo astaanta fajaca (!). Labadan dambe waxa jira xaalado gaar ah oo hawraarta xaggeeda dhexe ay galaan—waa na aynnu arki doonnaa, inshaa Allaah.

Shan hab oo kala duwan ayaa loo isticmaalaa joogsiga.

Habka kowaad: Joogsiga waxa la dhigaa dhammaadka jumladaha caadiga ah ee aan ay la soconin wayddiin toos ah ama fajac toos ah—bal se macne ahaan iyo dareen ahaan dhammaystiran.

T.A.: Cabdisamad waa arday wanaagsan. Sannad wal ba waxa uu galaa kaalinta kowaad. Macallimiintiisu na waxa ay u jecel yihiin si aad ah.

Saddexdaa jumladood mid wal ba waa jumlad caadi ah. Mid wal ba waxa ay noo sheegaysaa, ama ay noo qeexaysaa, wax.

Habka labaad: Joogsiga waxa la dhigaa dhammaadka erayada ama jumladaha amarka ah—bal se macne ahaan iyo dareen ahaan dhammaystiran.

T.A: Soco.

T.A.: Istaag.

T.A.: Soo qabo sakeelkan.

T.A.: Qalinka ii dhiib.

Habka Saddexaad: Joogsiga waxa la dhigaa dhammaadka jumlad ay ku jirto wayddiin dadban—bal se macne ahaan iyo dareen ahaan dhammaystiran.

T.A.: Gabyaaye waxa uu i wayddiiyay qofnimada Sagal.

T.A.: Iyaga su'aal waxa ay qabteen maanta.

T.A.: Yoonis waxa uu i warsaday sababta aan wax u qoro.

Mar kasta waxa aad ku haysaa maankaaga arrintan soo socota: Wayddiimaha dadban waxa la dhigaa dhammaadkooda "astaanta joogsiga," ee la ma dhigo "astaanta wayddiinta." Sidan soo socota waa khalad.

T.A.: Khaalid waxa uu i wayddiiyay in aan hayo buugga "Maana-Faay"? (sidan ayaa sax ah: Khaalid waxa uu i wayddiiyay in aan hayo buugga "Maana-Faay.")

Habka Afaraad: Joogsiga waxa la dhigaa dhammaadka xaraf kasta oo u taagan eray buuxa—si akhristaha loo dareensiiyo (loo ogaysiiyo) xarafkaasi in aannu ahayn xaraf keli ah ee uu yahay xaraf u taagan eray leh macne jira.

T.A.: N. N. K. H. A. (Naxariis iyo Nabadgelyo Korkiisa Ha Ahaato)

T.A.: I. R. H. K. N. (Ilaahay Raalli Ha Ka Noqdo)

T.A.: P. D. R. C. (Peace and Development Research Center)

T.A.: I. H. U. N. (Ilaahay Ha U Naxariisto)

T.A.: M. S. Barre (Maxamed Siyaad Barre)

Waxa jira xaalad gooni ah oo soo hoos galaysa qaaciiddadan oo ay tahay si fiican in loo fahmo. Kolka la soo gaabsado eray isaga oo aan higgaaddiisa la wada qorin, eraygaasi caynka uu doono ha noqdo e, xarafka ugu dambeeya eraygaa waa in la daba dhigaa joogsi.

T.A.: Mufak. Cabdiraxmaan S. Bashiir waxa uu ka mid yahay aqoonyahannada runta ah ee ay lee dahay Soomaalidu. (Eraygu, caadi ahaan, waxa uu ahaa "mufakkir"—laakiin waa la soo gaabsaday.)

T.A.: Farxaan waxa uu dhintay Okt. 24, 1969. (Eraygu, caadi ahaan, waxa uu ahaa "Oktoobar"—laakiin waa la soo gaabsaday.)

T.A.: Buugaagta uu qoray Bs. Maansuur mid ba mid ka ma dhaco. (Eraygu, caadi ahaan, waxa uu ahaa "Barasare"—laakiin waa la soo gaabsaday.)

Habka Shanaad: Joogsiga waxa la dhigaa dhammaadka eray wal ba oo ka mid ah erayada cinwaannada degellada ah—si akhristuhu inta uu u minguuriyo uu dabadeed u booqdo degelka loo qoray.

T.A.: www.samiik.wordpress.com

T.A: www.ceelgaal100.blogspot.com

Joogsiga haddii aan ka tago, oo sidan aad arki doonto aan qoro: wwwceelgaal100blogspotcom, degelka sidaa ah internetka ka ma heli kartid. Markaa, qofkii aan u qoray degelkaa aan jirin, run ahaan waa aan luggooyay! Miyaa ay san ahayn?

Waxa kale oo iya na ay tahay in aan iftiiminno, tiradu marka ay wadato tobanle, si aan loo moodin tiro caadi ah, joogsiga ayaa la adeegsadaa.

T.A.: 100.26$ (boqol doollar, iyo labaatan iyo lix senti)

Ugu dambayntii, qormadeennan wacan waxa aan ku soo gebagebaynayaa xaalad cusub oo ku soo korodhay isticmaalka joogsiga, aalaa na waxa lagu arkaa buugaagta suugaanta (kuwooda sheekafaneedka ah). Joogsiga waxa ay ka dhigaan makiinad leh af badan oo erayada jumladaha si xoog ah u jarjaraysa. Akhristaha si ay akhriskiisa u macaaneeyaan, oo dareenkiisa u hiyikaciyaan, ayaa ay dhibsadaan dhererka badan ee jumladaha, oo jeclaystaan in ay qoraan jumlado gaagaaban—walow ba mid wal ba

yaa aan ay yeelan macne iyo dareen buuxa e. Tusaalahan soo socda bal u fiirso.

T.A.: Albaabka ayaa uu laad ku soo jabiyay. Isaga oo ordaya ayaa uu daf soo yidhi qolka hurdada. Waa uu xanaaqsan yahay. Xoog u ciilaysan yahay. Oo aad u murugaysan yahay. Xaaskiisii oo ka yaabtay qubqacda badan ayaa degdeg uga hor timid. Isla kolkii uu arkay ayaa uu ku salaamay dharbaaxo kulul. Dabadeed laad dabada u qabtay. Hadda na feedh kala daalay markii ay dhulka xoog ugu dhacday. Qayladeedii xoogganayd ayaa dariskii oo dhan soo wada toosisay. Gurigii ayaa hal mar daaraddiisii la soo buuxiyay. Judhdhii uu arkay arrintaa ayaa uu cagaha wax ka dayay. Dig dig dig dig!

In badan oo ka mid ahi ma aha hawraarro leh macne iyo dareen dhammaystiran. Hadda na sidaa oo ay tahay, beryahan dambe waa arrin ku soo noqnoqota qoraalka kiisa suugaanta ah, aad na mooddo in la dhaqan geliyay. Aragti ahaantayda, u ma arko dhaqankaa mid xun—waxa aan u arkaa dhaqan wanaagsan oo qofka jeclaysiinaya akhriska, siinaya na tamar badan oo uu ku sii wado akhriskiisa. Waxa aan dhihi karnaa: Akhristaha ayaa ay ka caawinaysaa akhriskiisa in uu dedejiyo isaga oo helaya hadalka qoran dabuubtiisa. Hadafka ugu weyn ee la doonayo qoraalku in uu xaqiijiyo na, akhristaha in uu raalli geliyo weeye, oo u abuuro jawi macaan oo ka saacidi kara in uu dhammaystiro akhriskiisa wacan.

■ ■ ■

(4) Sumadda afaraad:

- **Isticmaalka Saxsan Ee Wayddiinta (?)**

Marar badan waxa aan isa su'aalay qofka insaanka ahi maxaa ku dhaliya wayddiin? Waxa aan u dan lee yahay: Wayddiinta laftirkeeda maxaa sababa?

Baadhis dheer ka dib, labadan arrimood ee soo socda ayaa aan helay, waa na xeerarka aan rabo astaantan in aan ku fadhiisiyo.

Arrinta Kowaad: Waxa aynnu ugu yeedhaynnaa "wayddiimo toos ah." Waa wayddiimo ku abuurma qofka oo badanaa ka yimaadda wax uu akhriyay, ama wax uu baadhay, ama wax uu arkay, ama wax uu dareemay—iyo, xattaa ama wax loo sheegay, ama wax ku soo dhacay maankiisa ba. Bal tusaalayaashan soo socda u fiirso.

B: Cabdiqaadir waa nin wanaagsan.

T: Ma Cabdiqaadir baa ah nin wanaagsan?

. . .

B: Xalay oo dhan ma aan seexan.

T: Oo maxaa aad qabanaysay?

B: Abtigay oo xanuunsan ayaa aan hayay.

. . .

B: Sidee ayaa aan u noqon karaa qoraa wanaagsan?

T: Marka hore, baro aqoonta qoraalka. Marka labaad, baro aqoonta afkaaga. Marka saddexaad na, wax badan qor.

. . .

B: Saciidoow, horta waallidu waa maxay?

T: Waallidu wax kale ma aha aan ahayn in aad samayso dhaqan aan laga aqoon degaankaaga. Tusaale ahaan, degaanka aad ku nooshahay dadkiisu haddii ay dhar xidhaan, adigu na aad is qaawiso oo aad dhar xidhan waydo, waa lagu la yaabi doonaa, waxa na laguu arki doonaa "qof waallan." Sida oo kale, haddii aad tagto degaan dadkiisu wada qaawan yihiin, adigu na aad dhar xidhato oo aad is qaawin waydo, waa lagu la yaabi doonaa, waxa na laguu arki doonaa "qof waallan." Sidaa darteed, waallidu, waa in aad samayso dhaqan aan laga aqoon (ama laga jeclayn) bay'ada aad ku nooshahay.

. . .

B: Imisa bog ayaa aad akhrisaa ayaan kasta?

T: Konton bog. Adigu na?

B: Anigu bogagga ma tirsado. Hal buug ayaa aan akhriyaa maalin wal ba.

Sookoobid: Wayddiinta waxa la dhigaa dhammaadka erayga (t.a., sidee?) ama hawraarta (t.a., magacaaga ii sheeg?) ay ku jirto wayddiin toos ah. Wayddiin dadban haddii ay ku jirto, waxa aad dhigaysaa joogsi, sidii aan ku soo sheegnay casharkeennii ku saabsanaa astaanta joogsiga.

Arrinta labaad: Waxa aynnu ugu yeedhaynnaa "wayddiimo shakki ah." Aadamuhu, aalaa, waa shakki badan yahay. Waxa dhacda qof uu doonayo in uu ka warramo in uu sixi kari waayo magaciisa. Waxa kale oo dhacda taariikh uu doonayay in uu qoro in uu ku kalsoon waayo saxnimadeeda. Sidaa ku sii wad! Sidaa darteed, si uu u muujiyo shakki, oo akhristaha ugu sheego xogtan uu la wadaagay in aannu hubin sax iyo khalad ka ay tahay, ayaa uu adeegsadaa astaanta wayddiinta. Bal tusaalayaashan soo socda u fiirso.

T.A.: Cabdullaahi waxa uu dhintay (2005tii?).

Qoruhu waxa uu noo sheegay in aannu hubin sannadka saxda ah ee uu dhintay Cabdullaahi—laakiin uu u malaynayo in uu ahaa 2005tii.

T.A.: Cabdiweli waxa ay walaalo yihiin nin lagu magacaabo Yaasir(?) oo labo gu' ka yar. Ninkaasi waa nin da' yar oo aad u akhlaaq badan. Hooyadii waxa ay ii sheegtay ubadka ay dhashay in ay ugu jeceshahay isaga.

Qoruhu waxa uu noo sheegay in aannu hubin Cabdiweli ninka ay walaalaha yihiin magaciisu in uu yahay Yaasir—laakiin uu u malaynayo in uu yahay sidaa.

Si akhristuhu u garto meesha uu ku jiro mugdigu (shakkigu), waxa wanaagsan meeshaa in la geliyo

astaanta bilaha, dabadeed na labadaa bilood dhexdooda la dhigo astaanta wayddiinta.

Sookoobid: Wayddiinta waxa la dhigaa dhammaadka erayga ama hawraarta aad aan hubin xog ahaan in ay sax tahay. Xogtaasi waxa ay noqon kartaa magac aad aan hubin in uu sax yahay; eray aad aan hubin in uu higgaad ahaan (ama dhawaaq ahaan) sax yahay; taariikh aad aan hubin in ay sax tahay; iyo wixii la mid ah. Wixii mugdi uu kaa galo oo dhan, astaantan u adeegso.

Saddex xaaladood oo gaar ah ayaa jira oo la adeegsado astaantan.

Xaaladda kowaad: Marmarka qaar waxa la arkaa hawraar dhammaystiran oo xagga dambe laga raaciyo weedh-wayddiineed. Bal tusaalayaashan soo socda u fiirso.

B: Jaallahay waa fariid, saw ma aha?

T: Haaheey.

. . .

B: Waxa aynnu orodnay masaafo dheer, ma nasannaa?

T: Haa.

Xaaladda labaad: Waqtiyada qaar waxa la isku daraa labada caalamadood ee wayddiinta iyo fajaca (?!). Sababtu maxaa ay tahay? Waa arrin dhan ka ah wayddiin, dhan kale na ka ah fajac. Labadaa ummuurood ee kala duwan jeerka ay kulmaan, ayaa labadan calaamadood oo isku dheggan la isticmaalaa. Bal tusaalayaashan soo socda u fiirso.

T.A.: Ma gabadhii uu wax u dhigi jiray ayaa uu kufsaday?!

Qofkaa hadlay waxa loo sheegay macallim aad u weynaa oo aad loo qaddarin jiray in uu kufsaday ardayad uu wax bari jiray. Kolkaa, waxa uu la anfariiray macallimkii weynaa ee edabta badnaa in uu ku kacay dambi aad u weyn oo aad u edab xun. Waxa maankiisa geli la' oo wayddiintan fajacu ku lammaan yahay ka keenay hebelkii dhawrsoonaa ee uu yaqaannay in uu inan yar faraxumeeyay.

T.A.: Ma adigaagan sidan u eg ayaa ay naag qurux badani ku jeclaatay?!

Qofkaa hadlay waxa fajac badan ku abuuray ninka la hadlay ee uu sheegay in ay jeclaatay naag qurux badan. Waxa uu og yahay in uu yahay nin aad u foolxun oo naag qurux badan iska daa oo, naag foolxumi xattaa aan ay meel cidlo ah ka qaadateen. Kolkaa, waxa maankisa geli la' ninkii aad taqaannay ee fooshaxumaa ayaa naag qurux badani ay jeclaatay.

Xaaladda Saddexaad: Waxa jira jumlado caadi ah laakiin qaabkii wayddiinta oo kale leh—qofku na uu sugayo ama uu rejaynayo in wayddiintiisaa nooca kale ahi looga jawaabo. Bal tusaalayaashan soo socda u fiirso.

B: Adigu waa aad ii ballanqaadaysaa in aad i jeclaato?

T: Haa, waa aan kuu ballanqaadayaa.

. . .

B: Iyadu waa naag doqon ah?

T: Nacam, Ilaahay baa aan ku dhaartay e, waa doqon.

Ugu dambayntii, qormadeennan wacan waxa aan ku soo gunaanadayaa hal arrin oo dignin ah. Astaanta wayddiinta waxa ay la mid tahay, awood ahaan, astaanta joogsiga. Sida joogsiga aan ay suuragal ahayn astaan kale in la dhigo gadaasheeda, ayaa ay tani na aan ay suuragal ahayn astaan kale in la dhigo gadaasheeda (marka laga reebo xaaladda gaarka ah ee labada astaamood ee wayddiinta iyo fajaca la isku daro, ee aynnu ka soo hadalnay).

■ ■ ■

(5) Sumadda shanaad:

- **Isticmaalka Saxsan Ee Fajaca (!)**

Qofka bani'aadamiga ahi xaaladdiisu ma aha caadi mar wal ba. Mararka qaar waxa uu la kulmaa wax ka nixiya, wax ka farxiya, wax ka qosliya, wax ka xanaajiya, ama wax ka oohiya. Xaaladahaa, iyo kuwo kale oo weheliya, jeerka la doonayo in lagu cabbiro qoraal, ayaa la adeegsadaa astaanta fajaca.

Astaantani waxa ay muujisaa dareen xoog badan: dareen ka baxay xaaladdii "qarsoonaanta." Sababtaa darteed, qaar badan oo ka mid ah culimada qoraalku iyaga oo ka fajacay sida calaamaddani ay u keento bannaanka dareenka dhabta ah ee la qarinayay (ama qarsoonaa), ayaa waxa ay siiyeen ladhkan cajiibka ah: Astaantii Qiraalka!

Aynnu bal aragno siyaalaha kala duwan ee loo isticmaalo.

1: Qof ayaa soo galay qol. Ka dib waxa uu arkay mas. Aad ayaa uu u naxay. Hadalkan hoose ayaa uu yidhi.

- WAAAAA! Alla mas baa ku jira halkan.

Tusaale kale. Naag ayaa masaxaysay qolkeeda. Si kedis ah dabadeed waxa u soo galay walaalkeed. Kelyaha ayaa uu ka taabtay iyada oo maahsan. Cirka ayaa ay u boodday—masaxaaddii na si xoog ah ayaa

ay u tuurtay, naxdin darteed. Hadalkan hoose ayaa ay tidhi.

- Hah! Waar maxaa aad nooga taabatay kelyaha?

2: Ismaaciil waxa uu ka yimid shaqadii. Ma uu san ogayn in ay foolatay ooridiisii, loo ma na sheegin in ay dhashay wiil. Kokii uu yimid ayaa loo warramay. Aad ayaa uu u farxay. Hadalkan hoose ayaa uu yidhi.

- Al-xamdu lillaah! Ilaahayoow, wiilkan yar ii barakee.

Tusaale kale. Maryam duhurkii oo dhan waa ay hurudday. Roobkii xoogganaa ee da'ayay na ma ay san ka war qabin. Kolkii guriga ay ka soo baxday ayaa ay ku baraarugtay xaaladdaa. Waxa ay aad uga heshay jawiga macaan iyo meelaha badan ee biyuhu ka buuxsameen. Hadalkan hoose ayaa ay tidhi.

- Maashaa Allaah! Maanta jawigu waa kaalay arag.

3: Ilyaas waxa uu saaxiibtii Najma u sheegay in ay aad u qurux badan tahay. Iyo, weli ba, in ay lee dahay jidh macaan oo indhuhu aan ay ka jeedsan karin daqiiqad qudh ah. Najma waa ay qososhay. Hadalkan hoose ayaa ay tidhi.

- AHAHAHAHA! Iga kala daa ammaanta badan, Ilyaasoow.

Tusaale kale. Sakariye waxa uu daawaday maanta Sh. Dabcasar. Sida uu gadhkiisa u salaaxayo, sida uu indhihiisa mar ba nooc uga dhigayo, iyo sida uu erayada kol ba si ugu dhawaaqayo, ayaa uu in badan ku qoslay. Waxa uu se in badan ku qoslay hadalkiisan, "Caabudwaaq waxa laga helayaa 20,000 oo wiil oo noqda ciidammada qaranka." Hadalkan hoose ayaa uu yidhi.

- UHUHUHUHU! Wallaahi, wadaadkani waa qayrul caadi.

4: Ikraan waxa ay qaadan wayday taladii hooyadeed. Waxa loo sheegay in ay iska dayso raacitaanka gabannada yaryar oo ay ka adkaato casharradeeda. Jawaabteedii waxa ay noqotay iinyo, iyo qof xor ah baa aan ahay. Hooyadeed waa ay xanaaqday. Hadalkan hoose ayaa ay tidhi.

- Doqon! Ilkaha sare ayaa ku xalaalaynaya e, qof nool oo wax isku falaysa ma tihid.

Tusaale kale. Abtigii ayaa ku amray degdeg in uu u seexdo. Hadallo gunuunuc ah oo uu fahmi waayay ayaa uu ku soo celiyay. Inta uu xanaaqay ayaa uu dharbaaxay. Ka dib na kii yaraa oo ilmaynaya ayaa uu soo istaagay hortiisa. Hadalkan hoose ayaa uu ku yidhi.

- Aamus waaryaa! Hadda aniga oo ku arkaya jiifso.

5: Khadra waxa loo soo sheegay in la dilay walaalkeed. Weli ba isaga oo masjid ka soo baxay in ay dileen al-Shabaab. Argagax aan yarayn baa ku dhacay. Oohin ayaa ay miciin bidday. Hadalkan hoose ayaa ay tidhi.

- IHIHIIHIIHI! Walaalkayoow, maxaa laguu dilay?

Tusaale kale. Cunug aad u yar ayaa laga faramaroojiyay caagad yar oo uu jeclaa. Isla markii ba waxa uu bilaabay oohin.

- WAQAQAQAQAQAAQ!

Tusaalayaashaa badan ee aan keenay waa qaar ka mid ah dareemmada innagu badan. Kuwa kale oo dhanna uga qiyaas qaado.

. . .

Xaalado gaar ah ayaa jira oo la adeegsado astaantan cajiibka ah.

Xaaladda kowaad: Waxa lagu muujiyaa xaalad adag oo hadda na degdeg ah.

T.A.: Afar saacadood ka dib waxa aan weeraraynnaa Tukaraq. (dagaal adag oo degdeg ah)

T.A.: Jaamacadda waa in aad aaddaa isla hadda. (amar adag oo degdeg ah)

Xaaladda labaad: Waxa lagu muujiyaa diidmo ama quudhsi.

T.A.: Ma xilligan ayaa aad tagaysaa suuqa!

Iyada oo magaaladu amni ahaan xun tahay ayaa uu xilli habeennimo ah doonay in uu aado suuqa. Dabadeed, qofkii arkay ayaa aad u la yaabay, oo hadalkaa kakan ku yidhi. Nuxurka hadalkiisu waa sidan: Xilligan ha aadin suuqa.

T.A.: Ma sidan baa aad ku sheegataa qoraa!

Qofka lagu yidhi hawraartani waa qof aan ku fiicnayn qoraalka oo hadda na is moodaya in uu yahay qoraa weyn. Dabadeed, akhristihii cilmiga badnaa ee akhriyay qoraalkiisa, ayaa ka yaabay xaalkiisa, oo aad u quudhsaday. Waxa uu ka xanaaqsan yahay darajada sare ee uu isa siiyay. Nuxurka hadalkiisu waa sidan: Ma tihid qoraa.

Labada jumladood waxa ay ka siman yihiin in ay yihiin jumlado-wayddiineed. Sababta se loo siin waayay astaantii wayddiinta ee ay xaqqa u lahaayeen, ee loo siiyay astaanta fajaca, waa in la muujinayo "diidmo" ama "quudhsi." Labadaa xaaladood kolka la cabbirayo, hawraartu dhisme ahaan iyo/ama muuq ahaan u eg tahay ama ay tahay hawraar-wayddiineed, astaanta wayddiinta booskeedii waxa la dhigayaa astaanta fajaca. Ma fahamtay?

Xaaladda saddexaad: Waxa lagu muujiyaa qaadanwaa.

T.A.: Anigu waxa aan ahay naag wanaagsan(!) oo la jecel yahay.

Isaga oo og naagtaasi in ay tahay dhillo weyn, oo habeen wal ba martigelisa nin dhilley ah, ayaa uu qaadan waayay nafteeda in ay ku sifayso wanaag. Ma naag dhillo ah baa noqon karta naag wanaagsan? ayaa ay naftiisu isla kolkii ba ku soo celisay.

T.A.: Intii aan xilka hayay waxa aan sameeyay toban(!) mashruuc.

Isaga oo og, mashruuc uu sameeyo ha dambayso e, kuwii hore ee fiicnaa ee socday in uu joojiyay, ayaa uu qaadan waayay dadkiisa in uu ugu sheekeeyo beentaa weyn ee cad. Mashruucee samaysay oo run ah? ayaa uu hooshoos u su'aalayaa mas'uulkaa hadlay.

Wax kasta oo aad qaadan kari waydo, iyo xattaa kolalka qaar eray ama weedh kuu sameeya dhadhan ama dareen kugu cusub (oo fanifani ah), ayaa aad u isticmaali kartaa astaantan. Shardigu se waxa uu yahay, erayga ama weedha aad u dan lee dahay dhammaadkiisa labo bilood inta aad furto, calaamaddan in aad dhex geliso—sida ku cad labadaa tusaale ee kore.

Xaaladda afaraad: Waxa lagu muujiyaa kaftan.

T.A.: Waaryaa caloolbuur! Ma sidii ayaa aad u calool buuran tahay?

Labo nin oo jaalle ah oo kaftanka isla yaqaanna ayaa kaftamaya. Kii salaanta ku horreeyay ayaa bilaabay kaftanka—oo saaxiibkii daandaansaday.

T.A.: I guuro aa! Ma magaaladaan ka waayay nin.

Wiil iyo gabadh saaxiibo ah oo kaftanka isla yaqaanna ayaa kaftamaya. Aan ku guursado ayaa uu ku yidhi—isaga oo iyada yoolbaadhaya. Iya na waa ay u duurxushay.

Ugu dambayntii, qormadeennan wacan waxa aan ku soo gunaanadayaa hal arrin oo dignin ah. Astaanta fajaca waxa ay la mid tahay, awood ahaan, astaanta joogsiga. Sida joogsiga aan ay suuragal ahayn astaan kale in la dhigo gadaasheeda, ayaa ay tani na aan ay suuragal ahayn astaan kale in la dhigo gadaasheeda.

Fajacaagu haddii uu yahay qayrul caadi, hal mar ka badan waa aad adeegsan kartaa astaantan—oo, tusaale ahaan, sidan waa aad odhan kartaa: Ummaddeennu giddi waa munaafiqiin!!! (Ma jiro xeer ku xidhaya oo kuu xaddidaya inta goor ee aad soo celcelin karto astaanta fajaca. Hal mar ayaa aad qori kartaa, haddii aad u baahan tahay; haddii kale na, inta aad doonto.)

■ ■ ■

(6) Sumadda lixaad:

- **Isticmaalka Saxsan Ee Hakadka (,)**

Wax kasta ba haddii ay lee yihiin laandheere, calaamaddani waxa ay u tahay laandheere calaamadaha kale. Labo aqoonyahan ah na arrintaa ku ma muransana. Shaqooyinka ugu badan ee ay qabtaan astaamuhu marka loo qaybiyo saddex meelood, labo meelood oo dhan waxaa qabata astaantan. Sababtaa ayaa ay ku noqotay laandheere—ku na noqotay calaamadda loogu gefafka badan yahay.

Neefta bani'aadamku waa ay xaddidan tahay, aalaa. Ruuxu jeerka uu hadlayo, meelo badan baa uu ku hakadaa, sababo badan baa na dhaliya hakashadaa. Sababahaa ayaa sameeya astaantan cajiibka ah. Kuwaa ayaa aan qodobbaynaynnaa—qodob kasta na saddex tusaale oo fiican ka bixinaynnaa. Calaamaddan in aan baranno oo si wanaagsan u adeegsanno waa aynnu ku khasban nahay. Waayo?

Sidii aan ku soo sheegnay qormadeennii kowaad ee hordhaca u ahayd casharradan taxanaha ah, adeegsigeeda khaldani sabab waxa uu u noqon karaa qof nool in la dilo.

. . .

1: Waxa lagu taxaa magacyo, falal, ama tilmaamo la doonayo in la xidhiidhiyo.

T.A.: Bandhiggii shalay waxa aan isku aragnay Mustafe, Guuleed, Cabdisamad, Jimcaale, Axmed, iyo Cabdullaahi.

T.A.: Khadar inta uu cadayday, quraacday, jimicsaday, qubaystay, oo lebbistay ayaa uu aaday dugsiga.

T.A. Maryam waxa ay i siisay telefoon cusub, cad, ballaadhan, oo qurux badan.

Isla xeerkan innaga oo ku dhex jirna, hakadku waxa uu xidhiidhin karaa labo hawraarrood oo kala madaxbannaan. Wax se khasab ah helitaanka mid ka mid ah erayada wax xidhiidhiya: iyo, ama, bal se, laakiin, hadda na, hadda ba, se, na, . . .

T.A.: Sacdiyo waxa ay igu casuumtay xafladdeeda arooska, bal se waxa aan u sheegay in aan iman karin mashquul dartii.

. . .

2: Waxa lagu mideeyaa hawraarro badan oo ka hadlaya hal qof iyo wax la xidhiidha qofkaa. Ujeeddadu waa in hadalka la soo ururiyo si loo fudaydiyo akhriska, iyo si loo fahmo macnaha.

T.A.: Naciima waxa ay aadday, ka soo iibsatay buug, oo ka soo noqotay suuqa.

Asalka hawraarrahani sidan hoose ayaa ay u qornaayeen.

Naciima waxa ay aadday suuqa. Naciima waxa ay soo iibsatay buug. Naciima waxa ay ka soo noqotay suuqa.

T.A.: Cabdullaahi waxa uu tagay jaamacadda, waxa uu ka soo dhigtay labo maaddo, waxa uu na ku soo laabtay gurigiisii.

Asalka hawraarrahani sidan hoose ayaa ay u qornaayeen.

Cabdullaahi waxa uu tagay jaamacadda. Labo maaddo ayaa uu ka soo dhigtay. Dabadeed waxa uu ku soo laabtay gurigiisii.

T.A.: Salwa waxa ay booqatay, u soo tacsiyaysay, oo hadyado u gaysay saaxiibteed Nadiira.

Asalka hawraarrahani sidan hoose ayaa ay u qornaayeen.

Salwa waxa ay booqatay Nadiira. Saaxiibteed waa ay u soo tacsiyaysay. Hadyado na waa ay u gaysay.

. . .

3: Waxa lagu kala basriyaa qof si toos ah loo la hadlayo ama laga hadlayo, iyo qofkaa wixii loo sheegayay ama laga sheegayay.

T.A.: Siddiiq, si fiican ii dhegayso.

Siddiiq baa si toos ah loo la hadlay. Maxaa loo sheegay? Waxa loo sheegay si fiican in uu wax u dhegaysto.

T.A.: Cabdiqaadir, waa nin aad u jecel barashada dadka iyo dalka.

Cabdiqaadir baa si toos ah looga hadlay. Maxaa laga sheegay? Waxa laga sheegay nin aad u jecel barashada dadka iyo dalka in uu yahay.

F.G.: Cabdiqaadir si toos ah haddii aan wax looga sheegayn, ee hadalku uu yahay hadal caadi ah oo ka warramaya Cabdiqaadir, hakadkaasi waa uu suulayaa—loo ma baahna.

T.A.: Cabdiqaadir waa nin aad u jecel barashada dadka iyo dalka.

Labada hawraarrood ee dambe maxaa ay ku kala duwan yihiin? Hawraarta hore cid gaar ah baa ay "si

toos ah" u baraysaa ninka lagu magacaabo Cabdiqaadir waxa uu yahay. Xogta laga sheegayo waa xog ay si gaar ah u danaynayaan. Laakiin hawraarta dambe "si caadi ah" baa ay u faallaynaysaa ninka lagu magacaabo Cabdiqaadir. Xogtiisa cid si gaar ah u danaynaysaa ma ay jirto. Kaladuwanaanshuhu waa sidaa.

Isla xeerkan innaga oo ku dhex jirna, hakadka waxa lagu kala basriyaa erayga iskii isu taagi kara (sida: haa, maya, iinyo, waayo, sabab, . . .) iyo hadalka ka dambeeya eraygaa. Sida oo kale, waxa lagu kala basriyaa eray muujinaya dareen gaar ah, iyo hadalka ka dambeeya eraygaa. Mar saddexaad, waxa lagu kala basriyaa qof magaciisa ama si kale loogu yeedhay, iyo hadalka ka dambeeya yeedhmadaa.

T.A.: Haa, aniga ayaa arkay.

T.A.: Maya, ku ma siinayo lacag.

T.A. Qadhaadhaa, yaa cuntadan kariyay?

T.A.: Qaaq, waar ninku maxaa uu ku hadlay?

T.A.: Fartuuneey, si dhab baa aan kuu jecel ahay.

T.A.: Kaagaa dheeroow, kaalay qashinkan qaad.

. . .

4: Waxa lagu kala jaraa hawraarta iyo weedha. Hawraar waxa aan ka wadaa hadal dhammaystiran oo leh macne iyo dareen buuxa (sentence). Weedh na waxa aan ka wadaa hadal dhiman oo aan lahayn macne iyo dareen buuxa (phrase).

T.A.: Afar sanno ka hor, Gabyaaye waxa uu ahaa guddoomiyaha xaafadda Iftin.

Hakadka inta ka horraysa waa "weedh," inta ka dambaysa na waa "hawraar."

T.A: Bishii hore, anigu waxa aan la kulmay xaaskayga Muna.

Hakadka inta ka horraysa waa "weedh," inta ka dambaysa na waa "hawraar."

F.G.: Weedhu haddii ay timaaddo hawraarta gadaasheeda, hakad loo ma baahna.

T.A.: Gabyaaye waxa uu ahaa guddoomiyaha xaafadda Iftin afar sanno ka hor.

T.A.: Anigu waxa aan la kulmay xaaskayga Muna bishii hore.

. . .

5: Waxa laga hormariyaa ama laga dibmariyaa hadalka xigashada tooska ah ee aan aadka u badnayn. Hadalka la soo xiganayaa haddii uu aad u badan

yahay, waxa habboon astaanta labadhibcoodka (:) in la adeegsado.

T.A.: Cawad waxa uu yidhi, "Soomaalidu waa munaafiqiin!"

T.A.: "Soomaalidu xoog baa ay u neceb yihiin qofka runta u sheega," waxaa yidhi Saleebaan.

T.A.: "Qof insaan ah oo lagu xidhay keli ah aragtidiisa ayaa uu dhiibtay," waxa ku dooday Samiik, "waa dulmi aad iyo aad u weyn!"

. . .

6: Waxa lagu kala habeeyaa hawraar dhammaystiran iyo hadal aad soo dhex gelinayso. Markan si loo muujiyo hadalka dheeriga ah ee hawraarta buuxda lagu darsaday—ee ujeeddada laga lahaan karo noqon karto in ay wax iftiimiso, ama in ay codsi soo gudbiso, ama in ay wax sharraxdo—, waxa la adeegsadaa "labo hakad."

T.A.: Cafish waxa uu doonayaa, sida aan is lee yahay, in aad u timaaddo.

Asalka hawraartu sidan hoose ayaa ay ahayd.

Cafish waxa uu doonayaa in aad u timaaddo. (Weedha "sida aan is lee yahay" aniga ayaa ku darsaday, iftiimin baa aan uga gol lee yahay, hawraarta asalkeeda na ka ma mid aha. Taa macnaheedu waa in

haddii la tiro hawraarta aan ay wax ba u dhimayn macne ahaan iyo dareen ahaan ba.)

T.A.: Waxa aan kaa rabaa, haddii aad haysatid, lix doollar.

Asalka hawraartu sidan hoose ayaa ay ahayd.

Waxa aan kaa rabaa lix doollar. (Weedha "haddii aad haysatid" aniga ayaa ku darsaday, codsi baa aan uga gol lee yahay, hawraarta asalkeeda na ka ma mid aha. Taa macnaheedu waa in haddii la tiro hawraarta aan ay wax ba u dhimayn macne ahaan iyo dareen ahaan ba.)

T.A.: Hargeysa, caasimadda Soomaalilaan, waxa dorraad lagu xidhay naag wax ku qorta Faysbuugga.

Asalka hawraartu sidan hoose ayaa ay ahayd.

Hargeysa waxa dorraad lagu xidhay naag wax ku qorta Faysbuugga. (Weedha "caasimadda Soomaalilaan" aniga ayaa ku darsaday, sharraxaad baa aan uga gol lee yahay, hawraarta asalkeeda na ka ma mid aha. Taa macnaheedu waa in haddii la tiro hawraarta aan ay wax ba u dhimayn macne ahaan iyo dareen ahaan ba.)

F.G.: Xaaladda noocan ah ee loo isticmaalo "labada hakad" waxa kale oo kuu furan in aad u isticmaasho astaanta bilaha. Waa adiga iyo doorashadaa.

T.A.: Cafish waxa uu doonayaa (sida aan is lee yahay) in aad u timaaddo.

T.A.: Waxa aan kaa rabaa (haddii aad haysatid) lix doollar.

T.A.: Hargeysa (caasimadda Soomaalilaan) waxa dorraad lagu xidhay naag wax ku qorta Faysbuugga.

. . .

7: Waxa lagu ilaaliyaa hadalka habdhiciisa si loo bandhigo macnihiisa, iyo si loo qurxiyo balaaqadiisa.

T.A.: Maraykanku, dhab ahaantii, sida la wada og yahay, waa dawlad xoog badan.

Saddex hakad ayaa ku jira hawraartaa. Midka hore waxa keenay Maraykanka oo si toos ah wax looga odhan doono. Midka xiga waxa keenay waxa laga odhan doono oo la caddaynayo run ahaanshahooda. Midka ugu dambeeya na waxa keenay waxa laga odhan doono ee la caddeeyay run ahaanshahooda oo mar kale la caddaynayo in la wada og yahay. Warkii laga sheegayay na waxa uu noqday dawlad xoog badan in ay tahay. Warkaasi saw run ma aha? Saw la ma wada oga?

Labadan tusaale ee kale kaa uga qiyaas qaado.

T.A.: Soomaalidu waxa ay, badankood, isku raacsan yihiin, dawladdii Siyaad in ay ahayd dawlad diktaytar ah oo xun.

T.A.: Taraam, sida dunida oo idil wada og tahay, xattaa annaga, waa madaxweyne waallan oo sida uu doono u hadla u na dhaqma.

. . .

8: Waxa lagu kala saaraa labo ama wax ka badan oo sifo ah oo sifaynaya qof ama shay keli ah.

T.A.: Cabdicasiis waa nin wax akhriya, wax na dhegaysta.

Qofka la sifaynayo waa Cabdicasiis uun. Labo jeer baa la sifeeyay. Mar waxa lagu tilmaamay in uu yahay nin wax akhriya, mar kale na nin wax dhegaysta.

T.A.: Ibraahim waa ruux aamus badan, faham badan, oo xikmad badan.

Qofka la sifaynayo waa Ibraahim uun. Saddex jeer baa la sifeeyay. Marka hore waxa lagu tilmaamay in uu yahay aamusane, marka xigta faahim, marka u dambaysa na xakiim.

T.A.: Dhagaxani waa mid adag, bilaa faa'iido na ah.

Waxa la sifaynayo waa dhagax uun. Labo jeer baa la sifeeyay. Mar waxa lagu tilmaamay adayg, mar kale na bilaa dheef.

. . .

9: Waxa lagu kala saaraa magaalo iyo gobol ay ka tirsan tahay, gobol iyo dal uu ka tirsan yahay, iyo dal iyo qaarad uu ka tirsan yahay. Sida oo kale, waxa lagu kala saaraa maalin iyo bil ay ka tirsan tahay, iyo bil iyo sannad ay ka tirsan tahay.

T.A.. Waxa aan ku nool ahay Hargeysa, Waqooyigalbeed, Soomaaliya.

T.A.: Qormadan waxa aan qorayaa maanta oo ah Lamme, Jeenaweri 29, 2018.

T.A.: Soomaaliya, Geeska Afrika, Afrika. (Qofka intaa akhriya waxa uu fahmayaa Soomaaliya in ay ku taallo Geeska Afrika, Geesku na in uu ka tirsan yahay qaaradda Afrika.)

. . .

10: Waxa lagu qurxiyaa salaamaha iyada oo salaanta xaggeeda dambe la dhigo—waa marka la qorayo warqad rasmi ah oo caadi ah e. Sida oo kale, cinwaannada ayaa lagu qurxiyaa iyada oo lagu kala qaybinayo—waa marka cinwaanku qaybsami karo e.

T.A.: Salaan sare Jaalle Hebel,

Hakadka waxa la dhigay xagga dambe ee salaanta. Waa salaan lagu furay warqad rasmi ah oo caadi ah. Warqaddaa marka la soo xidhayo na, hakad ayaa lagu soo xidhaa. Sidan hoose baa la sameeyaa.

T.A.: Daacadi korkaaga ha ahaato,

T.A.: Ma Shalay Ayaa Uu Waalnaa, Mise Maanta Ayaa Uu Waallan Yahay?!

Waa cinwaan maqaal oo labo qaybood u kala qaybsan. Labo ka badanna isla qaabkan baa loo kala qaybiyaa. Sidan hoose baa la sameeyaa.

T.A.: Dorraad Muslim, Shalay Masiixi, Maanta Mulxid, Berri Dhankee?!

. . .

Tobankaa xeer qofkii si wacan u fahma waxa uu si wacan u fahmay isticmaalka saxsan ee astaanta hakadka. Awood weynna waxa uu u yeelanayaa hakad wal ba in uu dhigo booskiisa saxda ah. Qormadan wacan waxa aan doonayaa in aan ku soo afmeero labo ogaysiis oo muhiim ah.

Ogaysiiska kowaad: Hawraar haddii ay wada socoto, oo ay lee dahay labo fal, ma aha labadaa fal in loo kala dhexaysiiyo hakad.

Khalad: Suleekha ayaa cayday, oo dishay Weedhsan.

Sax: Suleekha ayaa cayday oo dishay Weedhsan.

Ogaysiiska labaad: Hawraar haddii ay wada socoto, oo ay lee dahay labo falsameeye, ma aha labadaa falsameeye in loo kala dhexaysiiyo hakad.

Khalad: Khadar, iyo Kaariye ayaa kufsaday Kaltuun.

Sax: Khadar iyo Kaariye ayaa kufsaday Kaltuun.

■ ■ ■

(7) Sumadda toddobaad:

Isticmaalka Saxsan Ee Labadhibcoodka (:)

Hadalku, caadi ahaan, ka ma maarmo farshaxan. Farshaxanku, inta badan, ka ma yimaaddo hadalka lagu hadlayo, ee waxa uu ka yimaaddaa hadalkaa qoraalkiisa iyo quruxdiisa sida loo ogaasimo. Hadda

ba, astaantan labadhibcoodka ah ee aynnu arki doonno sida loo adeegsado, culimada qoraalku waxa ay siiyeen cinwaan cajiib ah: Astaantii Farshaxanka! Sababtu na, jaalle, si kale ma ahan e, waa meelaha ay dhacdo iyo meelahaasi sida la yaabka leh ee hadalka qoran ay u qurxiyaan u na qaabeeyaan.

Farshaxannimadaa cuddoon waxa la wadaagta astaan tan ku xigi doonta oo iyadu na leh ashqaraarkeeda weyn. Waa astaanta inta badan la khaldo adeegsigeeda ee aan u bixiyay "joogsihakad" (;). Qormada aan kaga hadli doono isticmaalkeeda saxsan baa aan ku faahfaahin doonaa sababta aan u sameeyay "eraybixintaa fiican."

Aynnu, hadda ba, isla aragno sida loo adeegsado labadhibcoodka.

1: Waxa laga hormariyaa labo iyo wax ka badan oo si "isdabasocod" ah loo taxayo, si akhristaha loo soo jeediyo dareenkiisa, si kolkaa lagu jalbeebo xogtii uu sugayay.

T.A.: Saddex arrimood baa sababay in aan noqdo akhriyaa weyn: waxa aan fahmay akhriska qiimihiisa iyo qaayihiisa, dabadeed waxa aan bartay sida wax loo akhriyo, ugu dambaynna waxa aan dejistay qorshe-akhriseed dhammaystiran.

Qofka aan la hadlayay waxa aan u sheegay jiritaanka saddex ummuurood oo iga caawiyay in aan noqdo akhriyaa weyn. Waa xog ii qarsoon oo aad u ah

muhiim. Maadaama aan jecel ahay sidayda oo kale in uu noqdo akhriste weyn, waxa aan u wacay dareenkiisa. Kolkii dareenkiisu dhankayga u soo jeestay na, waxa aan la wadaagay xogtii qaaliga ahayd.

T.A.: Labo wadaad oo Soomaali ah baa aan aad u dhegaystaa hadaljeedinnadooda: wadaad Mustafe I. Haaruun, iyo wadaad Cabdiraxmaan S. Bashiir.

Qofka aan la hadlayay waxa aan u sheegay jiritaanka labo sheekh oo aan xoog u dhegaysto muxaadirooyinkooda. Waa labo caalim oo aan jecel ahay oo aan wax badan ka faa'iiday. Si aan u baro, waxa aan u yeedhay dareenkiisa. Kolkii dareenkiisu i soo qaabbilay na, labadii buuni ayaa aan u sheegay magacyadooda.

Ma i la socotaa?

F.G. (1): Astaantani, markan, waxa ay u shaqaysaa sidii "wicitaanka." Qof jeerka uu ku soo waco, maxaa aad ka sugtaa? Saw ma aha in uu kuu warramo oo uu ku sheego macluumaaad? Waa sidaa oo kale. Waxa la adeegsadaa marka aad hayso xog—weli ba xog aad u ah muhiim. Qofka ayaa dareenkiisa lagu soo jeediyaa, si uu u qaabbilo xogta qaaliga ah ee la doonayo in loo sheego.

F.G. (2): Sidaa aan soo sheegnay marka loo isticmaalayo astaantan, waxa jira xeer adag oo ay tahay fulintiisa in loo hoggaansamo. Xeerkaasi waxa uu nagu xujjaynayaa, astaanta labadhibcoodka

hadalka ka horreeya in uu ahaado hadal samayn kara macne iyo dareen buuxa. Macne iyo dareen buuxa haddii aannu samayn karin, ma isticmaali kartid astaantan, baa uu na lee yahay. Hadda ba, sidee ku ogaanaysaa in uu samayn karo macne iyo dareen buuxa? Waxa aad ku ogaanaysaa hadalkaa gooni in aad u qorto, dabadeed na in aad isticmaasho joogsi. Joogsigaa aad samaysay haddii uu noqdo ansax, labadhibcoodku na waxa uu noqonayaa ansax. Waa sidaa!

Khalad: Habeenkii waxa aan ku fikiraa: guri in aan dhisto, gabadh in aan guursado, iyo gaadhi in aan yeesho.

Waa run—oo waa khalad! Khaladku xaggee ayaa uu ka yimid? Hadalka ka horreeya astaanta ma aha hadal leh macne iyo dareen buuxa. Oo sidee ayaa aan ku ogaannay? Joogsi ayaa aan ku miisaannay.

Habeenkii waxa aan ku fikiraa. (Waa anigaa joogsi sameeyay. Ma arkaysaa? Joogsigaasi ma ansax baa? Hadalkaasi miyaa uu lee yahay macne iyo dareen buuxa? Waa maya!)

Xaaladdu sidan oo kale marka ay tahay, sidan hoose ayaa la sameeyaa.

Sax: Habeenkii waxa aan ku fikiraa guri in aan dhisto, gabadh in aan guursado, iyo gaadhi in aan yeesho.

OG: Weligaa marka aad wax taxayso, ee aad rabto labadhibcood in aad adeegsato, ha isticmaalin fal soconaya oo si toos ah wax u taxaya. Waa digniin!

Sax: Habeenkii waxa aan ku fikiraa arrimo badan: guri in aan dhisto, gabadh in aan guursado, iyo gaadhi in aan yeesho.

. . .

2: Waxa laga hormariyaa erayada, tirooyinka, ama xuruufaha wax lagu tiriyo.

T.A.: Haddii aad doonayso in aad noqoto qof xor ah, waxa aan kula wadaagayaa afar talo oo muhiim ah. Kow: Wax badan akhri. Labo: Wax badan baadh. Saddex: Cabsida ka fogow. Afar: Keligaa fikir.

T.A.: Ma doonaysaa in aad noqoto qoraa? Saddexdan shay samee. 1: Aqoonta qoraalka si fiican oo tifaftiran u baro. 2: Afka aad rabto in aad wax ku qorto u yeelo garasho badan oo hagaagsan. 3: Wax badan, badan, oo badan qor.

T.A.: Saaxiibadday Khadra waxa aan ku nacay shan waxyaalood. B: Is ma qurxiso. T: Ku ma fiicna waxbarashada. J: Waalidkeed ma ixtiraamto. X: Qof isku kalsoon ma aha. KH: Ma ilaaliso ballanta.

. . .

3: Waxa laga hormariyaa hawraar si toos ah u macnaynaysa, u qeexaysa, ama u faahfaahinaysa hawraar ka horraysa.

T.A.: Adeegsiga Faysbuuggu waa mid fudud: Qof wal ba markii ba waa uu la jaanqaadi karaa.

Hawraarta dambe waxa ay macnaynaysaa hawraarta hore. Qof wal ba haddii uu Faysbuugga isla markii ba la qabsan karo, waxa iska cad isticmaalka Faysbuuggu in aannu adkayn. Macnahaa ayaa ay noo sheegaysaa.

T.A.: Farmaajo waa madaxweyne aad loo jecel yahay: Dadka ayaa uu dhex galayaa oo laabta galinayaa.

Hawraarta dambe waxa ay qeexaysaa hawraarta dambe. Dadka haddii aad dhex geli karto oo mid wal ba ku aamini karto laabtaada, waxa iska cad in aad tahay qof la jecel yahay oo aan xumaan la la rabin. Arrintaa ayaa ay noo qeexaysaa.

T.A.: Hargeysa waa magaalo weyn: Laascaaanood saddex laabkeed weeye.

Hawraarta dambe waxa ay faahfaahinaysaa hawraarta hore. Laascaanoood oo ah magaalo weyn haddii ay Hargeysa saddex jeer iyada ka weyn tahay, waxa iska cad in ay tahay magaalo weyn oo lagu lumi karo. Muuqaalkaa ayaa ay noo faahfaahinaysa.

. . .

4: Waxa laga hormariyaa hadal badan oo si toos ah loo soo xigtay.

T.A.: Jimcaale waxa laga wariyay xaqiiqadan weyn: "Soomaalilaan been baa ay ka sheegtay dimuqraaddiyadda ay tidhi waa aan qaadannay. Maraykan nin wariye ah ayaa BUUG WEYN ka qoray Madaxweyne Taraam. Dunida waxa uu u sheegay in uu yahay madaxweyne DOQON ah oo WAALLAN. Cidi ma ay xidhin. Xattaa loo ma hanjabin. Waayo? Dalku waa dal dimuqraaddi ah. Laakiin Soomaalilaan waxa ay xidhaa qof dadkiisa u sheegay riyo uu ku riyooday. Waxa ay xidhaa qof cabbiray aragtidiisa iyo dareenkiisa. Waxa ay xidhaa qof dhaliilay dawladdiisa oo qoraallo ku qoray Faysbuugga. Markaa, qof kasta waa uu og yahay Soomaalilaan in aan ay ku dhaqmin nidaamka dimuqraaddiyadda. Waxaa ba la odhan karaa waa sabab ka mid ah sababaha loo ICTIRAAFI la' yahay!"

T.A.: Hooyo ayaa sidan kula talisay inanteeda. "Hooyo, ma tihid quraarad jabaysa. Waxa aad tahay qof insaan ah oo kaamil ah. Weligaa diid in lagu quudhsado oo laguu arko miskiin yar oo aan lahayn itaal ay wax ku doonto, ama wax isaga difaacdo. Naag baa aad tahay oo ma aad tihid nin. Naagnimadaada ku faan oo yaa aan lagu necbaysiin. Ragga la sheekayso oo si fiican u baro dabcigooda iyo dhaqankooda. Kii naftaada iyo noloshaada qanciya ka xulo. In badan oo ka mid ah ragga waa iimaanlaawayaal e, yur ku dheh kii aad fahmi waydo. Ilaasho sharaftaada iyo karaamadaada. Sharaftaada iyo karaamadaada ha u

ilaalin reerkaaga dartii, ee uu ilaali adiga dartaa. Noolow, hooyo!"

F.G.: Hadalka la soo xiganayo haddii uu yahay hadal aan badnayn, waxa habboon in la adeegsado astaanta hakadka.

T.A.: Caa'isha waxa ay tidhi, "Illeen guurku waa dawo!"
. . .

5: Waxa laga hormariyaa eray, weedh, ama hawraar la doonayo in lagu nuuxnuuxsado.

T.A.: Xuseen hal shay ayaa uu aad u jecel yahay: dalxiiska

Qoruhu waxa uu sarbeebay Xuseen in uu jecel yahay ash'yaa badan, laakiin si gaar ah waxa uu ugu nuuxnuuxsaday in uu jecel yahay dalxiiska. "Dalxiiska," eraygaa, ayaa aad loogu nuuxnuuxsaday oo aad loo weyneeyay.

T.A.: Maryam hal mas'alo ayaa ay aad ugu dedaashaa: cilmi badan in ay yeelato.

Qoruhu waxa uu sarbeebay Maryam in ay ku dedaasho mas'alooyin badan, laakiin si gaar ah waxa uu ugu nuuxnuuxsaday in ay ku dedaasho cilmi badan in ay yeelato. "Cilmi badan in ay yeelato," weedhaa, ayaa aad loogu nuuxnuuxsaday oo aad loo weyneeyay.

T.A.: Docol hal arrin baa maankiisa ka guuxaysa: waxa uu rabaa in uu guursado.

Qoruhu waxa uu sarbeebay Docol maankiisa in ay ka guuxayaan arrimo badan, laakiin si gaar ah waxa uu ugu nuuxnuuxsaday in ay aad uga guuxayso in uu rabo in uu guursado. "Waxa uu rabaa in uu guursado," hawraartaa, ayaa aad loogu nuuxnuuxsaday oo aad loo weyneeyay.

Xaaladdan waxa la isticmaalaa marka la doonayo arrin (ama arrimo) muhiim ah in la sheego oo la iftiimiyo. Nuuxnuuxsigu na waa carrab ku adkayn uun.
. . .

6: Waxa lagu kala saaraa cinwaanka weyn iyo cinwaanka yar, iyo saacadda iyo daqiiqadaha.

T.A.: Hibadu: Ma Deeq baa, Mise Waa Dedaal?

Cinwaanka weyn ee laga hadlayo waa "hibada." Mawduucu maadaama uu yahay mid weyn, xagasha wax laga qorayo waa in la caddeeyo asal ahaan hibadu in ay tahay wax lagu dhasho, ama in ay tahay wax la baran karo.

T.A.: Saacaddu waa 08: 30

Saacadda laga hadlayo waa siddeeddii. Maadaama saacad wali ba ay lee dahay lixdan daqiiqo, imminka waxa lagu jiraa daqiiqaddii 30aad.

Isla xeerkan innaga oo ku jirna, astaantan waxa laga dibmariyaa cinwaan-hoosaadyada.

T.A.: Qeexidda Hibada:

T.A: Noocyada Hibada:

T.A.: Koboca Hibada:

Sida oo kale, qaybaha uu curisku u qaybsamo ee saddexda ah (hordhac, ubuc, iyo gebagebo), mid wal ba waxa laga dibmariyaa astaantan. Tani ma aha khasab, bal se waa mid wanaagsan.

. . .

Lixdaa xeer ee wada muhiimka ah baa loo isticmaalaa calaamaddan cajiibka ah. Waa lix meelood oo hadalka u yeela qurux iyo qaabayn wanaagsan. Farshaxannimada la sheegsheegaa na waa intaa uun.

Qormadeennan wacan waxa aan ku soo gunaanadayaa mas'alo aad u ah muhiim. Waxaa jira erayo gaar ah oo wax tusaaleeya, ama wax sharxa, kuwaa oo laga dibmariyo astaantan. Waxaa ka mid ah "sida, tusaale ahaan, metalan, iyo kuwa la xajmiga iyo awoodda ah."

T.A.: Wax akhri macnaheedu ma aha wax wal ba akhri. Waxa laga wadaa wixii leh waxtar fiican

akhri—tusaale ahaan: wixii kordhinaya iimaankaaga iyo garaadkaaga.

T.A.: Ilaahay waxa uu na siiyay nicmooyin badan (sida: indho, dhego, san, carrab, luqad, xorriyad, . . .) oo la inooga baahan yahay in aan u adeegsanno si qumman.

■ ■ ■

(8) Sumadda siddeedaad:

Isticmaalka Saxsan Ee Joogsihakadka (;)

Horay sidii aan u soo sheegnay, astaanta farshaxannimada qoraalka ku caanbaxday ee labadhibcoodka loo yaqaan waxa isku dhererisa, oo awooddaa kula tartanta, astaanta joogsihakadka. Tani waa tu adag oo, qorayaasha yaryar marka dhan la iska dhigo, qorayaasha waaweyn xattaa ka qayliyeen. Kuwaa waaweyn qaar ka mid ah baqdinta ay ka qabaan calaamaddan, iyo isticmaalkeeda saxsan, waxa ay ka gaadhay in ay soojeediyaan in laga saaro astaamaynta qoraalka!

Waa astaan leh amakaag badan oo leh raad weyn. Akhristaha waxa ay siisaa, ama se dheh hadyad waxa ay uga dhigtaa, istaagid (hakasho) ka gaaban ta joogsiga ee buuxda (.), ka na dheer ta hakadka ee kooban (,). Labadoodaa ayaa ay u dhexaysaa, si kooban haddii aan uga hadalno abtirsiinyaheeda. Marka la qorayo na, illeen waa labo calaamadood oo la isku daray oo dabadeed laga dhex sameeyay calaamad cusub ee, jeerka kowaad waxa la qoraa astaanta joogsiga, jeerka labaad na astaanta hakadka. Labadaa qodob maanka aniga oo si fiican ugu haya, dhaqanna ay ii tahay erayada qalaad ee loo baahan yahay macnahooda iyo ujeedkooda in aan eraybixiyo, erayga ajnabiga ah ee "semicolon" waxa aan ku af Soomaaliyeeyay "joogsihakad." War fiican dheh!

Si aan, hadda ba, uga boganno, waxa aan isku dayayaa qaababka loo adeegsado si wanaagsan in aan u qeexo

iyo, sida oo kale, qaab wal ba in aan ka bixiyo labo tusaale oo fiican. Idinna, jaallayaal, waxa aad isku daydaan tan iyo saaxiibbadeed ba adeegsigooda saxsan marar badan in aad akhrisaan. Iyo, dhaqangelin badan oo joogtaysan in aad ku samaysaan, buugaagta sida wacan loo qoray na had iyo jeer aad u fiirsataan sida ay u isticmaalayaan astaamaha iyo, mid kasta ba, halka ay dhigayaan iyo halkaasi macnaha ay u samaynayso qoraalka. Saddexdaa ummuurood oo is kaabaya uun ayaa kaa kaalmayn kara si qumman in aad u fahamto, u na adeegsato, astaamaynta qoraalka.

. . .

1: Waxa ay isku xidhdhaa labo hawraarrood oo dhisme ahaan kala madaxbannaan, se mawduuc ahaan xidhiidh leh, si loo muujiyo cilaaqada ka dhexaysa. Shardi waxa ah labadaa jumladood aslan ba in aan ay lahayn xidhiidhiye (ujeeddo: in aan la adeegsan erayada "iyo," "ama," "laakiin," iyo kuwa la midka ah). Waayo? Astaantan ayaa shaqadoodii qabanaysa oo labada hawraar ee ay isku xidhayso xidhiidhinaysa. Macnaha dhaw ee ay wadaagaan waxa laga sii dhex curin karaa macne qarsoon oo qiimi badan.

T.A.: Dadka badh ka mid ah marka ay wax qorayaan waxa ay adeegsadaan kombiyuutar; badhka kale na waxa ay adeegsadaan qalin iyo xaashi.

Labadaa jumladood dhisme ahaan waa ay kala madaxbannaan yihiin—oo mid kasta ba si gaar ah baa loo qori karaa. (Dadka badh ka mid ah marka ay wax qorayaan waxa ay adeegsadaan kombiyuutar. Badhka kale na waxa ay adeegsadaan qalin iyo xaashi). Maxaa, hadda ba, loo xidhiidhiyay oo hal hawraar oo dheer looga dhigay? Jawaabtu waa in labadu ba hal mawduuc ka wada hadlayaan: qaababka aadamuhu wax u qoro. Mawduucaa ayaa dabcan xidhiidhinaya, mid kasta na wax ka sheegayaa. Labadaa jumladood iskudarkoodu waxa uu noo faa'iideeyay macne ah, in aad wax ku qorto kombiyuutar iyo in aad wax ku qorto xaashi in ay yihiin labada qaab ee keli ah ee wax lagu qori karo maanta, haddii la rabo in loo faa'iideeyo ummadda.

T.A.: Waxa aan lee yahay imtixaan adag berri; waa in aan wax badan akhriyaa maanta.

Labadaa jumladood dhisme ahaan waa ay kala madaxbannaan yihiin—oo mid kasta ba si gaar ah baa loo qori karaa. (Waxa aan lee yahay imtixaan adag berri. Waa in aan wax badan akhriyaa maanta.) Maxaa, hadda ba, loo xidhiidhiyay oo hal hawraar oo dheer looga dhigay? Jawaabtu waa in labadu ba hal mawduuc ka wada hadlayaan: u diyaargarow imtixaan. Mawduucaa ayaa dabcan xidhiidhinaya, mid kasta na wax ka sheegayaa. Labadaa jumladood iskudarkoodu waxa uu noo faa'iideeyay macne ah, imtixaanka adagi in uu u baahan yahay akhris badan, haddii la rabo in la keeno dhibco sare.

. . .

2: Waa isla habka hore, laakiin markan labada jumladood waxa xidhiidhinaya falkaab-xidhiidhiye (conjunctive adverb), ama weedh-hagideed (transitional phrase).

T.A.: Labadeennu waa aynnu is qaddarinnaa; dhab ahaan, waxa aan u malaynayaa waxa aan noqon doonnaa jaallayaal is jecel.

Labadaa jumladood dhisme ahaan waa ay kala madaxbannaan yihiin—oo mid kasta ba si gaar ah baa loo qori karaa. (Labadeennu waa aynnu is qaddarinnaa. Waxa aan u malaynayaa waxa aan noqon doonnaa jaallayaal is jecel.) Si loo xidhiidhiyo, oo is jacaylkaasi loo caddeeyo mawduuc ahaan meesha uu ka imanayo, waxa loo baahday falkaab-xidhiidhiye. Waxa la isticmaalay "dhab ahaan." Labadaa jumladood iskudarkoodu waxa uu noo faa'iideeyay macne ah, is qaddarintu in ay keeni karto is jacayl, haddii la rabo in la is jeclaado.

Falkaabyada noocan ah ee wax xidhiidhiyaa waa ay badan yihiin. Waxa ka mid ah dhab ahaan, sidaa darteed, si kasta ba ha ahaatee, hasayeeshee, dhanka kale, sida kale, haddii kale, mar kale, taa beddelkeed, si wal ba, . . . Falkaab kasta waxa uu xidhiidhiyaa labo hawraar oo kala xor ah, waxa uu na sheegaa wax ay wadaagaan, ama wax ay ku kala duwan yihiin, ama nooc uun oo xidhiidh ah—tusaale ahaan: sida ay u kala horreeyaan, ama sida ay isu sababeeyaan (ama

isu saameeyaan). Mid kasta oo sidaa ahi marka loo adeegsanayo sida aan soo aragnay, hortii waxaa khasab ah in la dhigo joogsihakad, gadaashii na hakad (sida ku cad tusaalaha sare).

T.A.: Ibraahim ma aannu gaadhin yoolkiisii uu jeclaa; maxaa yeelay, waxa uu ka jawaabi waayay caqabadihii la soo darsay.

Labadaa jumladood dhisme ahaan waa ay kala madaxbannaan yihiin—oo mid kasta ba si gaar ah baa loo qori karaa. (Ibraahim ma aannu gaadhin yoolkiisii uu jeclaa. Waxa uu ka jawaabi waayay caqabadihii la soo darsay.) Si loo xidhiidhiyo, oo guuldarradaasi loo caddeeyo mawduuc ahaan meesha ay ka imanayso, waxa loo baahday weedh-hagideed. Waxa la isticmaalay "maxaa yeelay." Labadaa jumladood iskudarkoodu waxa uu noo faa'iideeyay macne ah, yool kasta in la gaadho in ay ka horrayso caqabadaha ku gudban yoolkaa in laga jawaabo, haddii la rabo in la guulaysto.

Weedhaha noocan ah ee akhristaha haga waa weedho loo isticmaalo in ay isku xidhaan fikrad iyo fikrad kale, ama jumlad iyo jumlad kale, ama tuduc iyo tuduc kale, ama cutub iyo cutub kale. Weedh kasta akhristaha waxa ay ku hagtaa in uu fahmo waxa la isku xidhayo, iyo waxaa sida la isugu xidhayo. Aad baa ay u badan yihiin. Waxa ka mid ah maxaa yeelay, tusaale ahaan, weli, taa oo, iyada oo, in kasta oo, ugu horrayn, ugu dambayn, marka kowaad (marka labaad, sii wad), isla markii (isla markaa, isla markuu,

sii wad), ka sokow, taasi, . . . Mid kasta oo sidaa ahi marka loo adeegsanayo sida aan soo aragnay, hortii waxaa khasab ah in la dhigo joogsihakad, gadaashii na hakad (sida ku cad tusaalaha sare).

. . .

3: Waxa lagu kala saaraa erayo, weedho, ama hawraarro qaab taxane ah u wada socda, iyada oo horay la soo isticmaalay hakad. Sababta sidaa loo yeelayo waa in akhristaha laga ilaaliyo wareer badan oo ku dhici lahaa, akhriskiisa na loo fudaydiyo (dheh loo macaaneeyo).

T.A.: Bilihii ugu dambeeyay waxa aan booqday magaalooyin badan oo ay ka mid yihiin Laascaanood, caasimadda gobolka Sool; Ceerigaabo, caasimadda gobolka Sanaag; Burco, caasimadda gobolka Togdheer; Hargeysa, caasimadda gobolka Waqooyigalbeed; iyo Boorama, caasimadda gobolka Awdal.

Hawraartaa waxa aan ku sheegay magacyada shan caasimadood oo aan booqday. Shantaa sheegistooda haddii aan ku ekaan lahaa, u ma aan baahdeen joogsihakad. Laakiin kolkii aan doonay caasimad wal ba in aan sheego gobolka ay caasimad u tahay, aniga oo labadoodaa hakad u dhexaysiiyay (caasimadda, iyo gobolka ay caasimadda u tahay), waxa aan u baahday joogsihakad. Joogsihakad haddii aan aan samayn lahayn, akhristahaygu aad baa uu u wareeri lahaa. Bal hawraartan hoose akhri.

(Bilihii ugu dambeeyay waxa aan booqday magaalooyin badan oo ay ka mid yihiin Laascaanood, caasimadda gobolka Sool, Ceerigaabo, caasimadda gobolka Sanaag, Burco, caasimadda gobolka Togdheer, Hargeysa, caasimadda gobolka Waqooyigalbeed, iyo Boorama, caasimadda gobolka Awdal.) Waa bilaa joogsihakad, saw ma aha? Maxaa aad, hadda ba, ka fahamtay? Saw ku ma aad aan dawakhin?

T.A.: Maxkamaddu waxa ay shalay deldelaad ku xukuntay Siddiiq, ina Foosiya Aadam; Sakariye, ina Naciima Cabdiraxmaan; iyo Saciid, ina Nawaal Faarax.

Tusaalahan dambe waxa uu la mid yahay ka hore. Joogsihakadka waxa keenay markii aan qof wal ba sheegay magaca hooyadii, si loo garto. Haddii qof wal ba aan sheegi lahaa magaciisa oo keli ah, hakadka uun baa igu filnaan lahaa.

. . .

4: Waxa lagu calaamadiyaa hadal qaybtiisa hore uu yeeshay macne fiican oo lagu "hakan" karo, weli se aan yeelan macne buuxa oo lagu "qanci" karo."

T.A.: Aqoonyahanku ma aha ruuxa wax bartay ee shahaadooyin sare sita uun: aqoonyahanku waa ruuxa aqoontii uu bartay iyo waaqiciisa is waafajiya oo ummaddiisa gorfeeye weyn u noqda.

Hadalkaa qaybtiisa hore waa lagu hakan karaa, laakiin dhab ahaan maskaxdu ma qanci karto oo waxa ay is wayddiinaysaa, "Aqoonyahanku, hadda ba, waa kee?" Qaybta dambe ayaa ka jawaabtay su'aashaa culus.

T.A.: Guushu ku ma timaaddo dheeldheel, kaftan, iyo mala'awaal; guushu waxa ay ku timaaddaa han, hadaf, iyo hawlkar oo sida ay u kala horreeyaan loo kala hormariyo.

Tusaalahan dambe waxa uu la mid yahay ka hore. Hadalkaa qaybtiisa hore waa diidmo lagu hakan karo, laakiin dhab ahaan maskaxdu ma qanci karto oo waxa ay is wayddiinaysaa, "Guushu, hadda ba, maxaa ay ku timaaddaa?" Qaybta dambe ayaa ka jawaabtay su'aashaa culus.

. . .

5: Waxa lagu balballaadhiyaa sabab dhalisay natiijo ama natiijo leh sabab. Labo hawraarrood oo ta hore ay sababtay ta dambe, ama ta dambe ay sababtay ta hore, ayaa lagu kala basriyaa. Sababta ama natiijada midka aad doonto ayaa aad soo hormarin karaa—wax se loo baahan yahay astaantan in aad aan illaawin.

T.A.: Anigu ma jecli xaaskayga; jeer wal ba waa ay i xamataa.

Waxa la soo hormariyay natiijada. Ka dib na waxa la sheegay sababta keentay in uu jeclaan waayo xaaskiisa. Halkaa waxa laga fahmayaa, haddii xaaskiisu ay ka joojin lahayd xanta, in uu jeclaan lahaa.

T.A.: Hantidiisii oo dhan khamaar ayaa uu geliyay; maanta dadka ayaa uu tuugsadaa.

Markan waxa la soo hormariyay sababta. Ka dib na waxa la sheegay natiijada ah maanta in uu yahay tuugsade. Halkaa waxa laga fahmayaa, haddii uu hantidiisa ka dayn lahaa khamaarka, maanta in uu noqon lahaa bilyaneer weyn.

. . .

6: Waxa lagu kala qaybiyaa waxsoosaarro ka badan hal oo laga soo xigtay xog isku mid ah.

T.A.: Hawd, Aanadii Negeeye, 2007; Afax, Maana-Faay, 1981; iyo Ubax, Gaax, 2017

Saddexdaa sheeko marka aan ka soo qaato hal xog, ama arrin ay si fiican u iftiimiyeen xigashadeeda siinayo, sidaa kore ayaa aan ugu xusayaa qoraalka dhexdiisa.

T.A.: Guudcadde, Garashada Wax Laguu Gartay, 2015; Siibed, Himiladaada Hano, 2013; iyo Waaberi, Irridaha Farxadda, 2014

Tusaalahan dambe waxa uu la mid yahay ka hore.

. . .

7: Waxa laga hormariyaa eray la macne ah eray ka horreeya, ama weedh la macne ah weedh ka horraysa, ama hawraar la macne ah hawraar ka horraysa. Inta badan qaabkan waxa adeegsada, oo caan ku ah, qaamuusyada.

T.A.: Xikmad; murti

Xikmad iyo murti waa labo eray oo isku mid ah macne ahaan. Daliil waxa u ah joogsihakadka ka horreeya eraga "murti."

T.A.: Waxa uu tegay; waxa uu aaday

Tusaalahan dambe waxa uu la mid yahay ka hore. Labada weedhood waa isku mid macne ahaan.

T.A.: Iga iibi joodhaa bur ah; iga gad rufuc daqiiq ah

Tusaalan kale na waxa uu la mid yahay labada hore. Labada jumladood waa isku mid macne ahaan.

. . .

Qormadeennan wacan waxa aan ku soo gebagebaynayaa labo arrimood oo aan ka digayo.

Arrinta kowaad: Xidhiidhiyayaasha caadiga ah ee aan wada naqaanno (“iyo,” “laakiin,” “ama,” “oo,” “ee,” iyo kuwa la midka ah), marka ay labo jumladood xidhiidhinayaan, joogsihakad ha isticmaalin ee isticmaal hakad.

Khalad: Cabdisamad waa nin wanaagsan; laakiin wax ba ma akhriyo.

Sax: Cabdisamad waa nin wanaagsan, laakiin wax ba ma akhriyo.

Khalad: Si aynnu u badinno waa in aynnu helnaa beeso badan; ama waa in aynnu helnaa caqli culus.

Sax: Si aynnu u badinno waa in aynnu helnaa beeso badan, ama waa in aynnu helnaa caqli culus.

Arrinta labaad: Marka aad wax taxayso, iyo marka aad hadalka ku nuuxnuuxsanayso, joogsihakad ha isticmaalin ee isticmaal labadhibcood.

Khalad: Dhiganahan waxa aan u hibaynayaa carruurtayda aan jecel ahay; Cabdullaahi, Sacdiyo, Faarax, Ayaan, Guuleed, iyo Canab.

Sax: Dhiganahan waxa aan u hibaynayaa carruurtayda aan jecel ahay: Cabdullaahi, Sacdiyo, Faarax, Ayaan, Guuleed, iyo Canab.

Khalad: Labo waddo oo keli ah baa kuu furan; reerkan ka tirsanow, ama dayday ahow.

Sax: Labo waddo oo keli ah baa kuu furan: reerkan ka tirsanow, ama dayday ahow.

■ ■ ■

(9) Sumadda sagaalaad:

- **Isticmaalka Saxsan Ee Jiitinta Dheer (—)**

Astaamihii ugu horreeyay ee bani'aadamku adeegsado ayaa ay ka mid tahay jiitinta dheeri, sida la hubo. Inta badanna, qoraallada rasmiga aan ahayn (sida: sheekooyinka, riwaayadaha, iyo iimayllada) baa si fiican u isticmaala. Astaantii labadhibcoodka ee aynnu soo aragnay, ee cajiibka ahayd, iyo astaamaha hakadka, bilaha, iyo joogsihakadka ayaa ay shaqooyinkoodii siiyaan—oo gebigeeda ba waxa ay ka dhigaan "astaan federaal ah." Bal se qoraallada rasmiga ah ee cilmiyaysan, ee dunidu maanta siiso mudnaan badan, calaamaddaa waxa ay u sameeyeen "shaqooyin xaddidan." Shaqooyinkaa ayaa aynnu, hadda ba, is baraynnaa maanta, oo si fiican u qeexaynnaa.

. . .

1: Waxa lagu dhex xareeyaa macluumaad ama fikirro aan muhiim u ahayn hawraarta dhismaheeda iyo fahamkeeda, bal se akhristaha la la jeclaaday in uu ogaado. Waxa dhici karta sababta loo la jeclaaday in ay tahay dib in loo xusuusiyo, ama in ay tahay hadda in loo qisho. Labadaa sababood baa, badanaa, farsamadan keena.

T.A.: Fikirradii waagii hore aan aaminsanaa—sacabku in uu yahay xaaraan, heestu sidaa oo kale, wadaadku in uu yahay indheergarad, iyo dadka kale oo dhan in ay yihiin caammo—ayaa ay dad badani aaminsan yihiin maanta.

Saaxiibkay, illeen waa aadame wax hilmaami kara ee, waxa aan dib u soo xusuusiyay fikirradii waagii hore aan aaminsanaa. Kolkaa ayaa aan u sheegay fikirradaa in ay jiraan dad badan oo aaminsan maanta. Fikirradaa waxa aan dhex geliyay labo jiitimood oo dheer; haddii aan sidaa yeeli lahayn, qoraalka waxa ay ku keeni lahaayeen macne-culays oo akhristuhu horay wax ba u ma fahmeen. Calaamaddan cajiibka ah baa aan ku asturay—ama se ku habeeyay.

T.A.: Afartii dhaqammood ee aan ku furay xaaskaygii hore—ixtiraam la'aan, nadaafad la'aan, karti la'aan, iyo garasho la'aan—ayaa aan ku arkay xaaskaygan dambe.

Saaxiibkay, illeen wax ba ka garan maayo xaaskaygii hore ee, waxa aan u qishay dhaqammadii aan ku

furay. Kolkaa ayaa aan u sheegay dhaqammadaa in aan ku arkay xaaskaygan dambe. Dhaqammadaa waxa aan dhex geliyay labo jiitimood oo dheer; haddii aan sidaa yeeli lahayn, qoraalka waxa ay ku keeni lahaayeen macne-culays oo akhristuhu horay wax ba u ma fahmeen. Calaamaddan cajiibka ah baa aan ku asturay—ama se ku habeeyay.

Fikirrada ku jira hawraarta hore haddii aan ka saaro hawraartaa, hawraartaa wax ba u ma dhimayaan dhisme ahaan iyo faham ahaan labada ba; oo sababta loogu daray ba waa in qofka la la hadlayay dib loo xusuusiyo. Sida oo kale, dhaqammada ku jira hawraarta dambe haddii aan ka saaro hawraartaa, hawraartaa wax ba u ma dhimayaan dhisme ahaan iyo faham ahaan labada ba;; oo sababta loogu daray ba waa in qofka la la hadlayay wax loo qisho. Macluumaad ama fikirro kasta oo sidaa ah, la doonayo akhristaha si leh farshaxannimo in dib loo xusuusiyo ama in hadda loo sheego, ayaa habkan loo isticmaali karaa.

Tusaalayaashan kale waa kuwo dheeri ah.

T.A.: Boqollaal arday—oo Booskii, ina Faarax Cawad; Deeqadii, ina Jimcaale Geelle; iyo Caligii, ina Hurre Maxamed ka mid yihiin—ayaa saaka ka qalinbeddeshay Jaamacadda Muqdisho.

T.A.: Gabadhaydii—xaggay aadday horta? Mar allaale iyo marka loo baahdo ayaa la waayayaa!—

waxa ay doonaysaa in ay eeddadeed kuugu sii dhiibto hadyad.

. . .

2: Waxa lagu kala badhaa jumlad keli ah. Waa haddii ay lee dahay labo qaybood oo la kala jari karo, qayb wal ba na lee dahay macne gaar ah.

T.A.: Kulaylkani waa mid aad u daran—oo cid wal ba ka qaylisay.

Waa jumlad dheer oo labo qaybood loo kala jaray. Qaybta hore waxa ay sheegaysaa kulaylku in uu yahay mid daran. Qaybta dambe na waxa ay sheegaysaa darnaantiisaa yar iyo weyn in ay wada arkeen.

T.A.: Hargeysi waa magaalo aad u weyn—se dadkeedu waxa ay ka cabanayaan biyo la'aan.

Waa jumlad dheer oo labo qaybood loo kala jaray. Qaybta hore waxa ay sheegaysaa Hargeysi in ay tahay magaalo aad u weyn. Qaybta dambe na waxa ay sheegaysaa dadka ku nool magaaladaa aadka u weyni in aan ay haysanin biyo ku filan.

Tusaalayaashan kale waa kuwo dheeri ah.

T.A.: Ninkaasi wallaahay waa doqon—oo waxar jabtay xattaa lagu ma aamini karo.

T.A.: Maanta oo dhan baa aan ku sugaynnay—adigu na ciyaal baa aad iska raacday.

. . .

3: Waxa lagu kala saaraa hadal iyo erayo/weedho dheeraad ah oo hadalkaa wax ka sheegaya. Waxa dhici karta erayadaa/weedhahaa in ay wax iftiiminayaan, ama in ay wax xoojinayaan.

T.A.: Weedhsame ilaa yaraantiisii ayaa aan aqaanay—saaxibul caqli weeye.

Weedha jiitinta ka dambaysa waxa ay iftiiminaysaa Weedhsame in uu yahay maskaxmaal weyn.

T.A.: Fahiimaay, sida aan kuu jecel ahay ma qiyaasi kartid—run weyn!

Erayada jiitinta ka dambeeya waxa ay xoojinayaan jacaylka loo qabo Fahiima.

Tusaalayaashan kale waa kuwo dheeri ah.

T.A.: Boqollaal sanno ayaa Soomaalida qabyaalad iyo qaad laga waaninayay—wax ba ba ma maqlaan!

T.A.: Heesihii hore aad baa aan u jecel ahay—aad iyo aad.

. . .

4: Waxa lagu kala qaybiyaa hadal hore iyo hadal ka dambeeyay. Ama dheh fikir hore iyo fikir ka dambeeyay. Inta badanna, sabab baa keenta wixii hore in laga noqdo.

T.A.: Kitaabkaa cas ii soo qabo—maya, kaa cad ii soo qabo.

Hadluhu waxa uu jaallihii markii hore ka codsaday kitaabka cas in uu u soo qabto. Isla markii ayaa uu xusuustay kaasi in aannu ahayn kii uu doonayay, ee ka uu doonayo yahay ka cad.

T.A.: Koortaydii bal ka fiiri halkaa—iska daa jeebkayga ayaa uu ku jiraa ba.

Hadluhu waxa uu jaallihii markii hore ka codsaday telefoonkiisa in uu uga raadiyo meel uu u tilmaamay. In yar ka dib baa uu jeebkiisa gacanta geliyay, mise telefoonkii la raadinayay ayaa ba ku jira.

Tusaalayaashan kale waa kuwo dheeri ah.

T.A.: Shaadhkaa ii tiigso, jaalle—iska dhaaf.

T.A.: Waaryaahee, waxa aan ku wayddiiyay—ama iska daa.

. . .

5: Waxa lagu muujiyaa hadal aan loo dhihin si caadi ah. Ujeeddo: si qumman. Xaalado badan baa keeni kara hadalka in aan loo odhan si hagaag ah.

T.A.: H—hhha—weeyaay, w—www—aan ku j—jjj—ecel ah—hhh—ay

Sida aad garan karto, waa qof haghago leh, oo xuruufta qaar ay ku adag tahay ku dhawaaqistooda. Waxa uu doonayay in uu dhaho, "Haweeyaay, waa aan ku jecel ahay."

T.A.: Hoo—ooo—yoo—ooy, id—daa—aa—aa

Waa wiil yar oo ooyaya oo hooyadii ay dilayso. Waxa uu doonayaa in uu dhaho, "Hooyooy, i daa."

Tusaalayaashan kale waa kuwo dheeri ah.

T.A.: Nin—ninkii waa uu—waa uu —dhin—dhintay!

T.A.: Sicdiya—maya Sacdiya ayaa ii timid.

Xaalad kasta oo qofka ka weecisa hadalka in uu u dhaho si qumman baa loo isticmaali karaa habkan.

. . .

6: Waxa lagu iftiimiyaa hadal maqan ama ogaan loo qariyay.

T.A.: Cumar waxa uu i yidhi, "Waxa aan aadayaa Muqdisho dhawr cisho ka dib. Waxa i casuumay — — —."

Hadalkii Cumar markii aan soo xiganayay, markii aan sheegi lahaa ciddii ku casuumtay Muqdisho ayaa aan ciddii liqay ba. Waa aan garan waayay magacoodii. Dabadeed, booskoodii waxa aan dhigay jiitimo dheer.

T.A.: Afadaydu waa naag dhexdhexaad ah jidh ahaan iyo joog ahaan ba, leh kub weyn iyo dhex yar, iyo weli ba naaso — — —.

Dadka markii aan u sheegayay xaaskayga muuqaalkeeda jidheed, waxa aan ka qariyay naasaheedu sida ay yihiin.

Tusaalayaashan kale waa kuwo dheeri ah.

T.A.: Madaxweynaha Soomaalilaan waa madaxweyne — — —

T.A.: Shalay waxa aan ka shaahaynnay maqaaxida Nabad — Nolol.

Habkan Soomaalidu aad baa ay u garanaysaa—oo waxa ay u taqaan "buuxi meelaha bannaan." Macallimiinta ayaa, aalaa, isticmaala. Eray qudh ah haddii xuruuftiisa qaar la garan waayo ama ogaan loo qariyo, waxa wanaagsan in la isticmaalo calaamadda xiddigta (*). Eray dhan haddii xuruuftiisa la garan waayo ama ogaan loo qariyo, waxa khasab ah in la

adeegsado hal jiitin oo dheer (—). Hal eray wixii ka badan oo maqan ama kas looga tagay ayaa loo isticmaali karaa saddex jiitimood oo dhaadheer (— — —).

. . .

7: Waxa lagu caddeeyaa qof hadlayay oo aan hadalkiisa joojin, wax joojin karaa na aannu jirin, oo cid kale ka joojisay.

T.A.: "Weedhsan waxa ay doonaysaa—"

T.A.: "Maxaa ay doonaysaa?"

Qofkii hadlayay isaga oo rabay in uu sheego Weedhsan waxa ay doonayso ayaa laga soo dhex galay. Durba wayddiin degdeg ah baa laga hor keenay. "Maxaa ay doonaysaa?"

T.A.: "Caaddifadda waxaa keena—"

T.A.: "Wax ba ba ma keenaan!"

Qofkii hadlayay isaga oo rabay in uu sheego caaddifadda waxa keena ayaa laga soo dhex galay. Durba muran degdeg ah baa laga hor keenay. "Wax ba ba ma keenaan!"

Tusaalayaashan kale waa kuwo dheeri ah.

T.A.: "Maanta waa maalin—"

T.A.: "Axad ah."

T.A.: "Ninkii shalay wallaahi waa nin—"

T.A.: "Waar ninkaasi waa nin cajiib ah."

Sheekafaneedda iyo riwaayadda ayaa habkan caan ku ah. Haasaawaha jilayaasha ayaa aad ku arki kartaan qof hadlayay oo qof ama dad kale hadalkiisa ka jiidhayaan.

Hadalka sabab uun loo joojiyo—tusaale ahaan: qofkii hadlayay oo xabeebsaday, ama doonaya codka in uu beddesho, ama fikirkii oo la yara fogaaday—waxa loo isticmaalaa astaanta saddexdhibcoodka.

. . .

Qormadeennan wacan waxa aan ku soo gebagebaynayaa labo arrimood oo muhiim ah.

Arrinta kowaad: Marka hadal qalaad loo haltebinayo afkeenna, ama afkeenna loo haltebinayo af qalaad, waxa la adeegsadaa astaantan.

T.A.: Good country—dal wanaagsan.

T.A.: Waa in aynnu hadalnaa—We have to speak.

. . .

Arrinta labaad: Marka jiitinta dheer la adeegsanayo, iyada iyo hadalka (midka ka horreeya iyo midka ka dambeeya ba) waa in la isku dhejiyaa, oo aan wax masaafo ah loo dhexaysiin.

Khalad: Afartaa nin — Cabdirisaaq, Cabdiqaadir, Maxamuud, iyo Dalab — waxa ay qabteen shaqo qaran.

Sax: Afartaa nin—Cabdirisaaq, Cabdiqaadir, Maxamuud, iyo Dalab —waxa ay qabteen shaqo qaran.”

■ ■ ■

(10) Sumadda Tobnaad:

- **Isticmaalka Saxsan Ee Jiitinta Gaaban (-)**

Jiitinta gaabani waa hal xarriiq oo keli ah. Waa astaan muhiim ah oo loo baahan yahay—oo hawlo yara adag fududaysa. Hababkan soo socda ayaa loo isticmaalaa.

. . .

1: Waxa lagu xidhiidhiyaa erayo kala duwan oo mid kastaa ba uu lee yahay macne gaar ah, se wadartooda la doonayo macne cusub in laga dhaliyo.

T.A.: Iskaa-wax-u-qabso

Waa afar eray oo mid kastaa ba uu lee yahay macne gaar ah. Laakiin kolkii la isku daray waxa ay sameeyeen macne cusub.

T.A.: Calooshii-u-shaqayste

Waa saddex eray oo mid kastaa ba uu lee yahay macne gaar ah. Laakiin kolkii la isku daray waxa ay sameeyeen macne cusub.

F.G.: Erayada lammaan ee labada eray uun ka kooban, ee carrabku hal mar si fudud u wada akhriyi karo, leh na macne caanbaxay oo markii ba la wada garan karo, ma habboona in loo dhexaysiiyo jiitin gaaban.

Khalad: madax-weyne

Sax: Madaxweyne

Khalad: Aqoon-yahan

Sax: Aqoonyahan

Khalad: Ab-waan

Sax: Abwaan

Khalad: Indheer-garad

Sax: Indheergarad

. . .

2: Waxa lagu xidhiidhiyaa labo tiro oo kala duwan iyada oo markan la macne ah erayga "ilaa."

T.A.: 50-60 qof baa hoolkan ku jira.

Waxa ay la macne tahay: Konton ilaa lixdan qof baa hoolkan ku jira.

T.A.: Shirkeennu waxa uu socon doonaa Feebarweri 26-Maarso 10.

Waxa ay la macne tahay: Shirkeennu waxa uu socon doonaa Feebarweri 26 ilaa Maarso 10.

. . .

3: Waxa lagu xidhiidhiyaa eray horgale ah oo si toos ah ugu xidhmaya eray kale, isla jeerkaa na abuuraya dhadhan macneed oo gaar ah. Dhadhankaa ayaa la doonayaa akhristaha hadalka qoran akhrisanaya markii ba in uu fahmo.

T.A.: Arrintaasi waa ma-dhacdo.

Erayga "ma" ee diidmada ahi waxa uu ku xidhmayaa erayga kale ee "dhacdo." Hawraartaasi na waxa ay la macne tahay: Arrintaasi ma aha mid dhici karta.

T.A.: Oo sidaasi markaa waa ku-dhimo.

Erayga "ku" ee falkaabka ahi waxa uu ku xidhmayaa erayga kale ee "dhimo" Hawraartaasi na waxa ay la macne tahay: Xaal haddii uu sidaa yahay naftaada u baq.

Labada horgale haddii labada eray laga jaro, dhadhankii gaarka ahaa ee hawraarta macnaheeda lagu gudbinayay ayaa lumaya, akhristuhu na waa uu wareeri doonaa.

. . .

4: Waxa lagu yeedhiyaa eray ama hawraar. Marka eray ama hawraar si xarafxaraf ah loo yeedhinayo ayaa la adeegsadaa.

T.A.: "Erayga halkaa ku qoran ii yeedhi, adiga oo raalli ah."

T.A.: "S-a-m-i-i-k."

Erayga "Samiik" baa xarafxaraf loo yeedhiyay.

T.A.: "Hawraartaa ii higgaadi, Hayboow."

T.A.: "N-a-a-g-a-h-e-e-n-n-u w-a-a g-o-b."

Hawraarta "Naagaheennu waa gob" baa xarafxaraf loo yeedhiyay.

. . .

5: Waxa lagu kala qaybiyaa eray xuruuftiisa marka uu sadarku wada qaadi waayo.

T.A.: Guddoo-miye

Sadarkii ayaa ii oggolaan waayay erayga "guddoomiye" xuruuftiisa oo idil in aan ku wada qoro. Kolkaa, xuruuftii ayaa aan kala qaybiyay, oo intii uu qaadi karayay sadarku ayaa aan ku qoray—si aan u muujiyo xuruuf kale in ay maqan yihiin oo erayga higgaaddiisu wada dhammaynna, waxa aan adeegsaday jiitin gaaban.

T.A.: Borofee-sar

Sadarkii ayaa ii oggolaan waayay erayga "borofeesar" xuruuftiisa oo idil in aan ku wada qoro. Kolkaa, xuruuftii ayaa aan kala qaybiyay, oo intii uu qaadi karayay sadarku ayaa aan ku qoray—si aan u muujiyo xuruuf kale in ay maqan yihiin oo erayga higgaaddiisu wada dhammaynna, waxa aan adeegsaday jiitin gaaban.

. . .

Qormadeennan wacan waxa aan ku soo gebagebaynayaa hal arrin oo muhiim ah.

Calaamaddan, waa in erayada ama tirooyinka ay xidhiidhinayso la dhigaa dhexdooda, iyada oo aan laga durkinayn dhan kasta ba.

Khalad: Iskaa - wax - u - qabso

Sax: Iskaa-wax-u-qabso

Khalad: 50 - 60 qof baa hoolkan ku jira.

Sax: 50-60 qof baa hoolkan ku jira.

■ ■ ■

(11) Sumadda kow iyo tobnaad:

- **Isticmaalka Saxsan Ee Bilaha Wareegsan ( )**

Calaamaddan, sideeda ba, waxa lagu dhex qoraa "hadal dheeraad" ah. Hadalkaasi, dabcan, waxa uu ahaan karaa eray ama erayo. Waxa kale oo uu ahaan karaa weedh ama weedho. Waxa saddexaad oo uu ahaan karaa hawraar ama hawraarro.

Hadalkaa dheeriga ahi, ujeeddo ahaan, waxa suuragal ah in uu wax "caddaynayo." Waxa kale oo suuragal ah in uu wax "sharxayo." Waxa saddexaad oo suuragal ah in uu wax "iftiiminayo." Mar afaraad na waxa suuragal ah in uu wax "turjumayo." Midka ay noqoto ba, hadalkaa isaga ahi, waa mid qoraagu uu isku qanciyay in ay tahay muhiim in uu la wadaago akhristihiisa, si fahamkiisu u wacnaado.

Laakiin hadalka caadiga ah ee ay "dheeraadka" ku tahay muhiim u ma aha dhismihiisa iyo xattaa macnihiisa ba. Oo haddii laga saaro, wax nusqaan ah ku ma keenayso, habayaraato e.

Aan, hadda ba, keeno tusaalayaal badan oo hagaagsan—aanna mid kasta ba sheego hadalka dheeriga ahi ujeeddadiisa.

. . .

1: Wax baa lagu caddeeyaa.

T.A.: Kolka aan helo kansho (fursad) wacan baa aan ku soo wacayaa.

Erayga "kansho" ayaa aan isku qanciyay macnihiisu in aannu caddayn oo aan la wada fahmi karin. Kolkaa, akhristahayga aniga oo aan la doonayn eraygaa macnihiisa in uu ku dhibaatoodo, waxa aan eraygaa macnihiisa ku caddeeyay eray kale oo la mid ah se aad loo yaqaan.

T.A.: Ninkii Jimcaale ahaa cagaha ayaa uu wax ka dayay (waa uu cararay).

Sarbeebta ah "cagaha ayaa uu wax ka dayay" ayaa aan isku qanciyay akhristaha da'da yar ee maanta nooli in aannu si fiican u fahmi karin ujeeddadeeda. Dabadeed, macne kooban oo uu fahmi karo ayaa aan ugu caddeeyay ujeeddadeeda, si aannu u wareerin.

. . .

2: Wax baa lagu sharxaa.

T.A.: Cabdiqaadir (inankii shalay aad i bartay) ayaa aan caawa is aragnay.

Qofkii aan la hadlayay si aannu ii wayddiin Cabdiqaadirka aannu caawa is aragnay, waxa aan u sharxay ka uu yahay.

T.A.: Madaxweyne Biixi qaabkii uu ku yimid (fikir ahaantayda) waa qaab foolxun oo baalmarsan dastuurka Soomaalilaan.

Qofkii aan la hadlayay si aannu u moodin qiimaynta aan sameeyay in ay tahay mid cilmibaadhis cuskan, waxa aan u sharxay in ay tahay mid fikirkayga cuskan.

. . .

3: Wax baa lagu iftiimiyaa.

T.A.: Soomaalidu ilaa iyo inta ay is quudhsanayso (iyada oo aan ay jirin sabab ay isu quudhsanayso) ma ahaanayso ummad is jecel oo asaageed la tartanta.

Cid kasta oo qoraalkayga akhrida waxa aan u sheegay Soomaalidu in ay is quudhsato, waxa aanna u iftiimiyay in aan ay jirin sabab ay isu quudhsato. Taa macnaheedu waa in aan ay caafimaad qabin.

T.A.: Sacdiyo waxa ay ku dooddaa in ay tahay qoraa (laakiin sida ciyaalka ayaa ay wax u qortaa).

Cid kasta oo qoraalkayga akhrida waxa aan u sheegay Sacdiyo in ay ku dooddo in ay tahay qoraa, waxa aanna u iftiimiyay in ay sida ciyaalka wax u qorto. Taa macnaheedu waa in aan ay qoraa ahayn.

. . .

4: Wax baa lagu turjumaa.

T.A.: Waxa aan u baahan nahay fikrad siyaasadeed (political ideology) oo waaqiceenna la jaanqaadaysa.

“fikrad siyaasadeed” baa aan u sheegay akhristahayga afka Ingilishka waxa lagu dhaho, dunida siyaasadda marka la joogo.

T.A.: Wasiirkeennu waxa uu sheegay in loo baahan yahay political stability (xasillooni siyaasadeed) haddii la doonayo dalkeennu in uu hagaago.

“Political stability” ayaa aan u sheegay akhristahayga afkeenna hooyo waxa lagu dhaho, haddii uu wasiirkeennii dhammaa garan waayay.

. . .

OG: Waxa kale oo calaamaddan loo adeegsadaa marka faallo la dhiibanayo.

T.A.: Naciima waxa ay ii sheegtay in ay i jeceshahay (waxa aan se u malaynayaa in ay ii sheegayso been).

Hadalka dambe waa faallo aan ka dhiibtay warkii ay ii sheegtay Naciima.

. . .

OG: Waxa kale oo calaamaddan loo adeegsadaa marka xogbixin la samaynayo.

T.A.: Waxa aan booqday Muqdisho (caasimadda Soomaaliya) Arbacadii hore.

Muqdisho in ay tahay "caasimadda Soomaaliya" waa xog aan ku biiriyay akhristahayga.

. . .

Qormadeennan wacan waxa aan ku soo gebagebaynayaa calaamad tan la hoos geeyo oo aan u bixiyay "bilo labajibbaaran" ([ ]).

Bilo labajibbaaran waxa la isticmaalaa hal xaalad oo keli ah. Waa marka aad qorayso hadal xigasho ah oo aad aan adigu lahayn, isla jeerkaa na aad doonayso hadal aad adigu lee dahay in aad ku darsato hadalkaa xigashada ah. Si kooban, waa labo hadal oo mid uu yahay hadal aad soo xigatay, midka kale na uu yahay hadal aad adigu lee dahay oo aad ku dhex darsatay hadalkaa aad soo xigatay.

T.A.: Cabdullaahi waxa uu yidhi, "Anigu waxa aan ahay jaadgooni [waxa uu ka wadaa qof ka duwan dadka] jecel jaadgoonnimada."

"Waxa uu ka wadaa qof ka duwan dadka," waa hadalka aan anigu idhi, ee aan ku sharxay erayga jaadgooni. Hadal uu yidhi Cabdullaahi, oo hadalkiisii aan soo xigtay ku jiray, ma aha.

.

■ ■ ■

(12) Sumadda laba iyo tobnaad:

- **Isticmaalka Saxsan Ee Saddexdhibcoodka (. . .)**

Astaantani waxa ay ka kooban tahay saddex joogsi. Joogsi wal ba ku ma dheggana joogsiga kale. Masaafo yar baa loo kala dhexaysiiyaa saddexda ba (. . .). Qoraalka kiisa akadeemiga ah (academic writing) baa xeerkaa iska leh oo aad u soo celceliya. Qurux ahaanna, waxaa ba wacan in aan la isku dhejin ee masaafo yar loo kala dhexaysiiyo.

Calaamadaha qorayaasha Soomaaliyeed ay khaldaan, ee ay dambi badan ka galaan, baa ay tani ka mid tahay. Saddexdan hab ee soo socda ayaa loo isticmaalaa.

. . .

1: Waxa lagu muujiyaa hakad degdeg ah. Hakadkaa degdegga ah waxa keeni kara sababo badan: aamus degdeg ah, shakki degdeg ah, fikir degdeg ah, baqasho degdeg ah, qufac degdeg ah, oohin degdeg ah, amar degdeg ah, hadalkanoqosho degdeg ah, . . .

T.A.: Cabdiqaniyoow . . . ninkaa halkaa maraya miyaa aannu ahayn Foodhaadhi?

Hadluhu kolkii uu Cabdiqani magaciisa ugu yeedhay isla jeerkii ba waa uu hakaday. Ujeeddo ahaan: waa

uu aamusay. Sababta hakadka degdegga ah keentay waa in uu Cabdiqani si fiican u soo jeediyo si uu u la arko ninka uu doonayo in uu bidhaantiisa tuso.

T.A.: Maalintii uu jeclaaday Xamda . . . aan dhaho Xaliimo . . . ka dib, Dhagjar waxa uu la soo baxay caadooyin cusub.

Hadluhu kolkii uu magacaabayay Dhagjar naagta uu jeclaaday isla jeerkii ba waa uu hakaday. Ujeeddo ahaan: waa uu aamusay. Sababta hakadka degdegga ah keentay waa in uu ka shakkiyay magaceedu in uu yahay Xamda iyo in uu khaldayo. Isla judhdhiiba waxa uu gartay in uu khaldayo oo magaceedu yahay Xaliimo—waa uu na ka laabtay magacii hore ee gefka ahaa ee Xamda.

T.A.: Buugga "Halgan Iyo Hagardaamo" waa aan hayaa, jaalle . . . laakiin ma hayo hadda oo waxa labo toddobaad ka hor iga qaatay Gabyaaye.

Hadluhu kolkii uu sheegay buugga "Halgan Iyo Hagardaamo" in uu hayo isla jeerkii ba waa uu hakaday. Ujeeddo ahaan: waa uu aamusay. Sababta hakadka degdegga ah keentay waa in uu maankiisa dib ugu noqday oo is wayddiiyay hadda in uu hayo iyo in kale. Jawaabtii uu isla markii ba helay waxa ay noqotay in aannu haynin hadda oo labo toddobaad ka hor uu ka qaatay nin la dhaho Gabyaaye. Dabadeed, saaxiibkii ayaa uu isla judhdhii ba u sheegay xogta xusuustiisu u soo dirtay.

. . .

2: Waxa lagu muujiyaa hadal aan loo baahnayn oo laga tagay. Inta badan waxa la adeegsadaa xaaladda xigashada—oo hadalka oo dhan la ma soo xigto haddii aan loo baahnayn; inta loo baahan yahay oo keli ah baa la soo xigtaa. Hadalka la xadfay ama la masaxay waxa uu noqon karaa eray, ama weedh, ama hawraar. Waxa kale oo uu noqon karaa hal tuduc ama wax ka badan ba.

Hadalka hoos ku qoran u fiirso.

- Hargeysa, maanta, waxa ay u baahan tahay biyo badan oo ku filan.

Waxa aan doonayaa hadalkaa in aan soo xigto oo erayga "maanta" oo aan u baahnayn in aan ka tago. Sidee baa aan, hadda ba, yeelayaa? Sida hoos ku qoran baa aan yeelayaa.

T.A.: "Hargeysa . . . waxa ay u baahan tahay biyo badan oo ku filan."

Mar kale, hadalka hoos ku qoran u fiirso.

- Xamaraawi, waagii uu yaraa waxa loo yaqaannay Fooldheere, waa badhasaabka magaalada Hargeysa.

Waxa aan doonayaa hadalkaa in aan soo xigto oo weedha "waagii uu yaraa waxa loo yaqaannay Fooldheere" oo aan u baahnayn in aan ka tago. Sidee

baa aan, hadda ba, yeelayaa? Sida hoos ku qoran baa aan yeelayaa.

T.A.: "Xamaraawi . . . waa badhasaabka magaalada Hargeysa."

Mar saddexaad, hadalka hoos ku qoran u fiirso.

- Madaxweyne Cali KH. Galaydh waxa uu joogaa Maraykan. Dad aad u badan baa ku soo dhaweeyay halkaa. Waxa uu shirar kala duduwan la qaatay waxgaradka Saciid Harti.

Waxa aan doonayaa hadalkaa in aan soo xigto oo hawraarta "Dad aad u badan baa ku soo dhaweeyay halkaa" oo aan u baahnayn in aan ka tago. Sidee baa aan, hadda ba, yeelayaa? Sida hoos ku qoran baa aan yeelayaa.

T.A.: "Madaxweyne Cali KH. Galaydh waxa uu joogaa Maraykan. . . . Waxa uu shirar kala duduwan la qaatay waxgaradka Saciid Harti."

Afartaa joogsi ee halkaa ku qoran, mid waa joogsigii caadiga ahaa ee aynnu garanaynnay, oo waxa iska leh oo uu dhammeeyay hawraarta hore (Madaxweyne Cali KH. Galaydh waxa uu joogaa Maraykan[.]). Saddexda kale na, waa joogsiyadii astaantan, oo beddel waxa ay u yihiin hadalka maqan ee la xadfay. Sideeda ba, haddii ay hawraartu wadato joogsi, oo dabadeed la doono hadal ka dambeeya in la xadfo, waa in la qoraa "afar joogsi oo wada socda"—joogsigii

caadiga ahaa ee astaanta joogsiga, iyo saddexdii joogsi ee astaanta saddexdhibcoodka.

. . .

3: Waxa lagu muujiyaa badnaansho. Ujeeddo ahaan: wax badan oo haddii la doono in wada la tiriyo aan la wada tirin karin; iyada oo sababtu tahay badnaanshaha. Markan waxa ay la macne tahay erayga "sii wad."

T.A.: Nicmooyinka Alle uu na siiyay waxa ka mid ah nicmada abuurka, nicmada bani'aadamnimada, nicmada Islaamka, nicmada iimaanka, nicmada caafimaadka, nicmada caqliga, nicmada dhulka, nicmada Soomaalinnimada, . . .

Waxa aan doonay in aan tiriyo nicmooyinka Alle uu na siiyay. Waa aan tirin kari waayay; maadaama ay aad u badan yihiin. Qaar badan, oo aad wax ku fahmi karto, qiimaynna aad ku samayn karto, inta aan kuu sheegay, ayaa aan saddexdhibcood ku soo xidhay hawraartayda.

T.A.: Ifraax, dhabtii, waa naag aan diin lahayn, waa naag aan akhlaaq ahayn, waa naag aan gobannimo lahayn, waa naag aan dhiirranaan lahayn, waa naag aan karti lahayn, . . .

Waxa aan doonay in aan tiriyo dhaliilaha ay lee dahay Ifraax. Waa aan tirin kari waayay; maadaama ay aad u badan yihiin. Qaar badan, oo aad wax ku fahmi

karto, qiimaynna aad ku samayn karto, inta aan kuu sheegay, ayaa aan saddexdhibcood ku soo xidhay hawraartayda.

T.A.: Soomaalilaan qaanuun ka ma jiro, caddaalad ma taallo, sinnaan ha ba sheegin, maammulwanaag la mid, xorriyad ha ba soo hadal qaadin, . . .

Waxa aan doonay in aan tiriyo xaqiiqooyinka ka jira Soomaalilaan. Waa aan tirin kari waayay; maadaama ay aad u badan yihiin. Qaar badan, oo aad wax ku fahmi karto, qiimaynna aad ku samayn karto, inta aan kuu sheegay, ayaa aan saddexdhibcood ku soo xidhay hawraartayda.

. . .

Qormadaydan wacan waxa aan ku soo gebagebaynayaa labo arrimood oo muhiim ah.

Arrinta kowaad: Saddexda dhibcood waxa aynnu soo sheegnay in aan ay habboonayn in la isku dhejiyo ee mid wal ba la siiyo masaafo yar. Sidan waa khalad (…); sidan kale ayaa sax ah (. . .). Sida oo kale, saddexdaa dhibcood qoraalka dhexdiisa marka la gelinayo, qoraalka labadiisa dhinac waa in aan lagu dhejin, ee mid kasta ba masaafo yar loo dhexaysiiyaa.

Khalad: Saciid…waxa uu rabaa toban doollar.

Sax: Saciid . . . waxa uu rabaa toban doollar.

. . .

Arrinta labaad: Marka qof mawduuc uu ka hadlayay si degdeg ah uga baxo oo mid kale u galo, waxa la isticmaalaa astaantan. Inta badan ma dhacdo oo waa xaalad naadir ah.

T.A.: Khadra waa naag xun oo inta xalay ay i ballamisay, oo igu tidhi gurigayaga hortiisa soo taag, baa . . . ninkii Cabdullaahi ahaa in uu yimid saw ma ogid?

Hadluhu isaga oo Khadra mawduuceeda ku jiray oo saaxiibkii u sheegayay xumaanteeda, ayaa kolkii uu marayay erayga "baa" ayaa ay iyadii (waa Khadra e) timid goobta; dabadeed mawduucii ayaa uu si degdeg ah u beddelay. Mawduuc kale ayaa uu u wareegay oo ah Cabdullaahi iyo imaatinkiisii. Si fiican baa uu u wareegay!

.

■ ■ ■

(13) Sumadda seddax iyo tobnaad:

Isticmaalka Saxsan Ee Qoqobka (/)

Calaamaddani waxa ay u shaqaysaa sida xidhiidhiyaha "ama." Wax kasta oo uu xidhiidhiyahaasi qabto ayaa ay qabataa. Haddaa waa wax kasta!

Hadalka ayaa ay kala qoqobtaa oo kala dhex gashaa, aslan ba.

Waxa ay tilmaantaa labo eray (ama labo weedhood) oo isku macne ah oo isku dhigmi kara. Ama waxa ay tilmaantaa labo eray (ama labo weedhood) oo iska soo horjeeda oo la kala dooran karo.

Bal u fiirso tusaalayaashan hoose.

. . .

T.A.: Muna waxa ay rabtaa/doonaysaa in aad u shaqayso.

Waxa ay la macne tahay: Muna waxa ay rabtaa ama doonaysaa in aad u shaqayso. Labada eray ee

“rabtaa” iyo “doonaysaa” waa isku macne oo waa ay isku dhigmi karaan.

T.A.: Mahad waxa uu qorayaa buug/dhigane.

Waxa ay la macne tahay: Mahad waxa uu qorayaa buug ama dhigane. Labada eray ee “buug” iyo “dhigane” waa isku macne oo waa ay isku dhigmi karaan.

T.A.: Isaga/iyada had ba kii soo horreeya ayaa aan cashadan siinayaa.

Waxa ay la macne tahay: Isaga ama iyada had ba kii soo horreeya ayaa aan cashadan siinayaa. Labada eray ee “isaga” iyo “iyada” waa magacuyaallo u taagan labo qof oo la kala dooranayo.

T.A.: Taladaydu waxa ay tahay qisadan in aad dib u tifaftirto/ in aad dib u qorto.

Waxa ay la macne tahay: Taladaydu waxa ay tahay qisadan in aad dib u tifaftirto, ama in aad dib u qorto. Labada weedhood ee “in aad dib u tifaftirto” iyo “in aad dib u qorto” waa labo fikradood oo mid wal ba u baahan tahay shaqo badan oo la kala dooranayo.

. . .

Waxa kale oo ay tilmaantaa meerisyo maanso oo la kala qoqobayo si aan ay u wada noqon hal meeris oo

keli ah iyo, sida oo kale, fikirro wada socda si aan loo moodin hal fikrad oo keli ah.

Bal u fiirso tusaalayaashan hoose.

. . .

T.A.: "Giddigiin ka soo guda halkaa goor horraan idhiye / Adigaa garaad lehee Cabdiyoow nimankan gaagaaban / Guddoon wax'aad u sheegtaa ergada kii aad garan weydo / Galoof yahow garaadkaa int'aad gaar isu la shawrto / Shakki hadduu ba kaa galo adoon goolka dhalinaynin / Kubbaddaa gabaacuulsan laad haw giraangirin dheh." —Filasoof Dhoodaan (I. H. U. N.)

Lixdaa meeris ee gabay ee wada socda, ee meeris kasta ba sidiisa miisaan ahaan u dhisan yahay, ayaa aan ku kala qoqobay.

T.A.: "In kast'oo sabaannadan saranseer la soo maray / Amuu soomalhaadiyo jiray saxal Rabbaaniya / Amay saar xanuun iyo surucyada ku raageen / Ummaddu na sax iyo khalad kala saari waayeen / Ma saluugo midabkiyo sinjiga iyo magacoo / Soomaali baan ahay ummadaha la simanoo!—Gabayaa Kediye (I. H. I.)

Lixdaa meeris ee masafo ee wada socda, ee meeris kasta ba sidiisa miisaan ahaan u dhisan yahay, ayaa aan ku kala qoqobay.

T.A.: Haddii aad doonayso in aad noqoto qoraa wanaagsan wax badan ka baro aqoonta qoraalka / Samee akhris badan oo wata baadhis badan / Oo maalin kasta wax badan qor si aad u samayso khaladaad badan.

Saddexdaa fikir ee wada socda, ee mid kasta ba sidiisa fikir ahaan u dhisan yahay, ayaa aan ku kala qoqobay.

T.A.: Jaamacadda Muqdisho gal / Kulliyadda Dhaqaalaha Iyo Aqoonta Maammulka is qor / Oo ku dedaal simistar kasta kaalinta kowaad in aad gasho.

Saddexdaa fikir ee wada socda, ee mid kasta ba sidiisa fikir ahaan u dhisan yahay, ayaa aan ku kala qoqobay.

. . .

Waxa saddexaad oo ay tilmaantaa erayo isku macne ah oo la is daba gelinayo. Ama erayo isku xaalad ah oo la is dabagelinayo. Mid kasta ba waxa laga lee yahay ujeeddo.

T.A.: Xaas/afo/marwo/xilo/oori, intu ba, waa isku macne; kii aad qaadataa ba waa sax.

Intaa oo eray oo kala duwan higgaad ahaan waa isku mid macne ahaan. Ujeeddada laga lee yahay na waa in aad adeegsan karto kii aad doonto.

T.A.: Abwaan/qoraa/maansayahan/mufakkir/filasoof, intu ba, waa erayo qiimahoodii la tirtiray; oo cid wal ba maanta iska sheegato.

Intaa oo eray oo kala duwan macne ahaan waa isku mid xaalad ahaan. Ujeeddada laga lee yahay na waa in aad ka fogaato in aad isku sifayso.

. . .

Waxa afaraad oo ay tilmaantaa iyada oo kala qoqobaysa tirada sarreeyaha ah (numerator) iyo tirada hooseeyaha ah (denominator) sida ay u kala horreeyaan. Waa marka la joogo xisaabta jajabka.

T.A.: 8/4

Tirada siddeed baa sarreeye ah; tirada afar na hooseeye.

T.A.: 6/3

Tirada lix baa sarreeye ah; tirada saddex na hooseeye.

. . .

Waxa shanaad oo ay tilmaantaa iyada oo kala qoqobaysa erayada "iyo" iyo "ama" marka ay is raacaan shaqada ay qabtaan.

T.A.: Arday kastaa waa in uu keenaa berri afar kun iyo/ama koob biyo ah.

Waxa ay la ujeeddo tahay: Ardaygii keeni kara afar kun iyo koob biyo ah, ha wada keeno; ardaygii aan wada keeni karinna, ka u fudud ha keeno.

T.A.: Macallimku waa in uu ardada siiyaa maanta jimicsi fiican iyo/ama waano taabbagal ah.

Waxa ay la ujeeddo tahay: "Macallimku haddii uu ardada maanta wada siin karo jimicsi iyo waano, ha wada siiyo; haddii kale se, midka loo baahan yahay maanta ha doorto.

. . .

Qormadan waxa aan ku soo gebagebaynayaa labo arrimood oo muhiim ah.

Arrinta kowaad: Waxa kale oo loo adeegsadaa in lagu kala qoqobo maalinta, bisha, iyo sannadka, marka taariikhda la qorayo.

T.A.: Taariikhda maanta waxa weeye 27/02/2018.

Waxa ay la ujeeddo tahay: Taariikhda maanta waxa weeye 27dii bishii 2aad ee sannadka 2018.

. . .

Arrinta labaad: Iska ilaali adiga oo raba calaamadda loo yaqaanno "qoqobka hore—forward slash (/)" in

aad adeegsato calaamadda kale ee loo yaqaanno "qoqobka dambe—backslash (\ ).”

Khalad: Haddii\goortii Maxamed yimaaddo, waa aan tagayaa.

Sax: Haddii/goortii Maxamed yimaaddo, waa aan tagayaa.

.

■ ■ ■

(14) Sumadda afar iyo tobnaad:

- **Isticmaalka Saxsan Ee Hamsaha (‘)**

Hamsuhu waa astaan leh la yaab badan oo qoraalka Soomaaligeenna ku leh dawr aad u wacan. La’aantii waxa la arki lahaa, hubanti na ah, dhibaatooyin badan.

Qaababkan ayaa aan u qaabeeyay isticmaalka saxsan ee calaamaddan aniga oo ka duulaya dhismaha iyo abuurka erayga Soomaaliyeed.

. . .

1: Waxa lagu kala basriyaa dhawaqyo-shaqaleed oo aan bataatan ba is raaci karin, iyaga oo ku wada jira

hal eray oo keli ah. Haddii la doono in la is raaciyo, xaqiiqo waxa ah eraygu in uu beddelmayo macnihii iyo ujeeddadii uu ku lahaa afka; ama eraygu in uu ahaanayo mid aan ba la akhrin karin. Labada jeer ba, waxa abuurmaya eray cusub oo kakan oo aan ku jirin qaamuuska afka. Eray garanwaa ah!

T.A.: Waxa aan ka cabanayaa beryahan hurdo la'aan.

"La'aan." Ka warran haddii aan u qori lahaa sidan "laaan"? Saddex shaqal oo isku mid ah baa is raacay, saw ma aha? Bal ku dhawaaq! Halkaa waxa ka soo baxay eray cusub oo aan macne iyo ujeeddo ba lahayn oo aan la garanayn xididkiisa, sifadiisa, iyo dhaqankiisa afeed. Dhawaqyadaa shaqaleed waxa lagu kala basriyay hamse. Af Soomaaligeenna marka lagu noqdo xeerarkiisa, saddex shaqal oo isku mid ah is ma ba raaci karaan. Saw sidaa ma ogid?

T.A.: Ra'iisulwasaaraheennu waa in uu qaataa go'aan degdeg ah.

"Go'aan." Ka warran haddii aan u qori lahaa sidan "goaan"? saddex shaqal oo labo isku mid tahay mid na ka duwan yahay ayaa is raacay, saw ma aha? Bal ku dhawaaq! La ma ba akhrin karo, saw ma aha? Halkaa waxaa ka soo baxay eray dhan oo aan higgaaddiisa la kicin karin, iska ba daa macne iyo ujeeddo in uu yeesho e. Af Soomaaligeenna marka lagu noqdo xeerarkiisa, saddex shaqal oo kala duwan is ma ba raaci karaan. Saw sidaa ma ogid?

. . .

2: Waxa lagu kala basriyaa dhawaqyo-shibbaneed oo aan bataatan ba is raaci karin, iyaga oo ku wada jira hal eray oo keli ah. Haddii la doono in la is raaciyo, xaqiiqo waxa ah eraygu in uu beddelmayo macnihii iyo ujeeddadii uu ku lahaa afka; ama eraygu in uu ahaanayo mid aan ba la akhrin karin. Labada jeer ba, waxa abuurmaya eray cusub oo kakan oo aan ku jirin qaamuuska afka. Eray garanwaa ah!

T.A.: Soomaalidu waxa ay haysataa Mad'habta Shaaficiyada.

"Mad'habta." Ka warran haddii aan u qori lahaa sidan "madhabta"? Sidan baa aad u akhrin lahayd: ma-dhab-ta, saw ma aha? Halkaa maxaa ka soo baxay? Waxa ka soo baxay eray aan ahayn kii aan rabnay oo ah ku' cusub. Sidaa darteed, hamse markii aan adeegsan waynnay, eraygii aan rabnay si kale ayaa aan u qornay; sidaa ayaa keentay eraygii in uu beddelmo macne ahaan iyo ujeeddo ahaan labada ba. Ma i la socotaa? Af Soomaaligeenna marka lagu noqdo xeerarkiisa, labo shibbane is ma ba raaci karaan marka laga tago xarfaha "KH", "DH," iyo "SH" oo iyagu hal xaraf isku ah; iyo marka laga tago erayada soo noqnoqda, sida: yaryar, marmar, iyo carcar. Kolkol baa la arkaa labo shibbane oo duruuftu keentay in la is raacsiiyo iyaga oo aan is diiddayn (t.a., xadkabax, foolkafool, iyo marla'arag) Saw sidaa ma ogid?

T.A.: Si xad'dhaaf ah baa uu ii jecel yahay.

"Xad'dhaaf." Eraygaasi, abuur ahaan, waxa uu ka yimid erayada "xad" iyo "dhaaf" oo la isku lammaaniyay oo wada sameeyay macne cusub (oo la mid ah: "xadkabax"). Waxa uu noqday hal eray oo aan aslan ba la kala jari karin. Laakiin qoraalkiisii ayaa noqday mid adag ka dib markii ay is raaceen labo shibbane. Jiitin gaabanna ma wacna in lagu kala basriyo (t.a., xad-dhaaf) oo xaaladdaa waa uu ka soo gudbay oo eraygu dhawaq ahaan waa mid carrabku akhrin karo. Sida ugu fiicani waa in labadaa shibbane lagu kala saaro hamse si eraygu u noqdo mid qormi kara. Haddii se sidan loo qoro "xaddhaaf," halkaa waxaa ka soo baxaya eray aan ba la akhrin karin, oo higgaaddiisa aan ba la kicin karin. Saw ma aad aan fahmin?

. . .

3: Waxa lagu muujiyaa eray leh hakasho yar, oo aan hal mar carrabku si boobsiis ah u wada akhrin karin xuruuftiisa, se qaar ka mid ah xuruufta ku yara hakanayo. Ujeeddada sidaa loo samaynayo waa in akhristaha la fahamsiiyo erayga dhawaqiisa saxda ah iyo, sida oo kale, akhriskiisa in loo fudaydiyo oo aannu ku margan.

T.A.: Shimbirka hud'hudka aad baa aan u jecel ahay.

“Hud’hudka.” Carrabku marka uu inta hore (hud) akhriyo ayaa uu yara hakanayaa, dabadeed inta dambe (hudka) ayaa uu ka daba gaynayaa. Bal tijaabi!

T.A.: Siddiiq waa hal’abuur weyn oo Soomaaliyeed.

“Hal’abuur.” Carrabku marka uu inta hore (hal) akhriyo ayaa uu yara hakanayaa, dabadeed inta dambe (abuur) ayaa uu ka daba gaynayaa. Bal tijaabi!

. . .

Qormadan wacan waxa aan ku soo gebagebaynayaa labo arrimood oo muhiim ah.

Arrinta kowaad: Waxa kale oo astaantan loo adeegsadaa in lagu muujiyo cod adag oo hal mar wada go’aya.

T.A.: Lo’daasi waa lo’ weyn.

T.A.: Sidaasi ma aha si’ wanaagsan.

. . .

Arrinta labaad: Hamsaha waxa la dhigaa xarafka korkiisa ee la ma dhigo xarafka hoostiisa.

Khalad: Waxa aan ahay hal,abuur sare.

Sax: Waxa aan ahay hal’abuur sare.

■ ■ ■

(15) Sumadda shan iyo tobnaad:

- **Isticmaalka Saxsan Ee Guntimaha (“ “)**

Shay kolka la doonayo in la xafido oo aannu dheeldheel ku lumin, sida la og yahay, meel baa lagu xidhaa. Meeshaa cajiibka ah baa, hadda ba, loo yaqaannaa “guntin.” Labo xadhig ama wax kale kolka la doonayo in la isku xidho, si aan ay u kala furfurmin, “guntin” baa loo yeelaa. Qof Alle siiyay xikmad badan

kolka la la saaxiibo, falsafado badan baa laga bartaa, ama dheh laga "guntaa." Intaa oo macne iyo in ka badan ayaa uu erayga "guntin" (iyo erayada ka sii farcama ba) ku lee yahay afkeenna hooyo.

Hadda ba, astaantan oo reer Maraykan ay u yaqaannaan "quotation marks," reer Ingiriis ay u yaqaannaan "inverted commas," dad kale oo badanna ay u yaqaannaaan "speech marks"; anigu waxa aan u aqaan ku na af Soomaaliyeeyay "guntimo." Sababtu waxa ay tahay, jaalle, labadaa guntimood dhexdooda waxa lagu qoro, marka kowaad ma lumaan oo waa wax xifdisan. Marka labaad na, waa wax laga soocayo hadalka intiisa kale oo la siinayo ahmiyad gaar ah. Sidaa darteed, intii aan dhihi lahayn "calaamadaha xigashada," ama aan dhihi lahayn "astaanta xerada," waxa habboon af ahaan iyo macne ahaan ba in aan dhahno "astaanta guntimaha."

Labada hab ee loo isticmaalo, oo aan hadda sheegi doono, ayaa aad ka garan doontaa, jaalle, sababta aan u idhi "guntimo."

. . .

1: Waxa lagu xidhaa oo lagu xifdiyaa hadalka xigashada tooska ah ee xarafxaraf loo soo xiganayo. Maxaa sidaa loo samaynayaa? Waxa sidaa loo samaynayaa hadalka xigashada ah ee la soo amaahday in laga sooco hadalka kale—si aan loo samaynin "xatooyo qoraaleed."

T.A.: Bilaal waxa uu igu yidhi, "Soomaalilaan waa mashruuc cid gaar ahi ay ku bariisayso."

Hadalka ku jira labada guntimood waa hadal uu lee yahay Bilaal; ma aha hadal aan lee yahay anigu. Maadaama aan si toos ah oo xarafxaraf ah uga soo xigtay, hadalkiisa meel adag waa in aan ku xifdiyo, si aannu si dadban uga mid noqon hadalkayga.

Xusuusin: Hadalka xigashada ah, walow ba hal eray oo keli ah ha noqdo e, xarafkiisa kowaad waa in la weyneeyaa.

Ogaysiis: Joogsigu, kol kasta ba, waxa uu galaa astaanta gudaheeda marka aannu jirin hadal ka dambeeya hadalka ku qoran astaanta.

T.A.: "Marka aan ku arko ba waxa aan dareemaa farxad badan," ayaa ay igu tidhi Haweeya.

Hadalka ku jira labada guntimood waa hadal ay lee dahay Haweeya; ma aha hadal aan lee yahay anigu. Maadaama aan si toos ah oo xarafxaraf ah uga soo xigtay, hadalkeeda meel adag waa in aan ku xifdiyo, si aannu si dadban uga mid noqon hadalkayga.

Ogaysiis: Hakadku, kol kasta ba, waxa uu galaa astaanta gudaheeda marka uu jiro hadal ka dambeeya hadalka ku qoran astaanta.

T.A.: "Soomaalidu," ayaa uu yidhi Mahad, "waa ummad firfircoon."

Hadalka ku jira labada guntimood waa hadal uu lee yahay Mahad; ma aha hadal aan lee yahay anigu. Maadaama aan si toos ah oo xarafxaraf ah uga soo xigtay, hadalkiisa meel adag waa in aan ku xifdiyo, si aannu si dadban uga mid noqon hadalkayga.

Ogaysiis: Hadalka xigashada tooska ahi haddii uu qaybsami karo waa aad qaybin kartaa. Asalka xigashadu sidan baa ay ahayd, "Soomaalidu waa ummad firfircoon," laakiin se labo qaybood baa aan ka kala dhigay. Labadaa qaybood, qaybta kowaad waxa aad ku soo xidhaysaa hakad, qaybta labaad na xarafka kowaad waa aad yaraynaysaa.

Iftiimin: Habkan, sida oo kale, waxa aad u isticmaali kartaa hadalka ka yimid dhankaaga ee cid kale si toos ah aad ugu jalbeebtay.

T.A.: Beri hore ayaa aan ku idhi Boos, "Waxa aad tahay nin fiican oo dedaalaya."

Hadalka ku jira labada guntimood waa hadal aan anigu si toos ah ugu idhi Boos. Maadaama aan si toos ah oo xarafxaraf ah u soo xigtay hadalkayga, waa in aan ka soocaa hadalkayga kale oo meel adag oo xifdisan ku xareeyaa, si aannu si dadban uga mid noqon hadalkayga.

Ogaysiis: Labada calaamadood ee wayddiinta (?) iyo fajaca (!) marka baabka xigashada la joogo, waxa ay lee yihiin xeer gaar ah. Hadalka la soo xiganayo haddii

ay ka mid yihiin, labada guntimood dhexdooda ayaa lagu qorayaa. Haddii se hadalka guud ee la qorayo ay ka mid yihiin, labada guntimood bannaankooda ayaa lagu qorayaa. U fiirso tusaalayaashan!

T.A.: "Goorma ayaa aad dhalatay?" ayaa uu i wayddiiyay.

Wayddiintu waxa ay la socotaa hadalka xigashada tooska ah. Markaa, astaanta dhexdeeda ayaa lagu qorayaa.

T.A.: Ma sax baa Ducaale in uu dhaho, "Qof kasta oo iga yar waa aan dilayaa"?

Wayddiintu waxa ay la socotaa hadalka guud ee ka xigashadu ka midka yahay. Markaa, astaanta bannaankeeda ayaa lagu qorayaa.

T.A.: "Waa aan wada guulaysannay!" ayaa uu igaga farxiyay.

Fajacu waxa uu la socdaa hadalka xigashada tooska ah. Markaa, astaanta dhexdeeda waa in lagu qoraa.

T.A.: Wiil taajir ah uun baa ku yidhi Maariya, "Aan is guursanno"!

Fajacu waxa uu la socdaa hadalka guud ee ka xigashadu ka midka yahay. Markaa, astaanta bannaankeeda waa in lagu qoraa.

. . .

2: Waxa lagu calaamadiyaa waxsoosaar cinwaankii (sida: buug magacii, sheeko magaceed, maqaal magacii, sii wad) iyo eray/weedh ujeeddo uun laga lee yahay (sida: in la qeexo, in la duro, in la muhiimadeeyo, sii wad). Sababta sidaa loo samaynayo waa in akhristaha indhihiisa loo baaqo oo la tusiyo waxa la doonayo in la tuso, si uu u fahmo waxa la doonayo in uu fahmo. Waa nooc ka mid ah ishaarooyinka badan ee uu isticmaalo qoraagu.

T.A.: Qof kasta oo akhriya "Furaha Ganacsiga" waxa uu wax badan ka baran doonaa aqoonta ganacsiga.

Waxa aan astaantan ku calaamadiyay buug magacii. Waxsoosaar wal ba, nooc kasta ba oo uu yahay, ayaa astaantan lagu calaamadin karaa.

T.A.: Axmed Faarax Cali waxa uu caan ku yahay "Idaajaa."

Waxa aan astaantan ku calaamadiyay qof naanaystii. Magac wal ba oo ay cidi lee dahay, ama ba loo bixiyo, ayaa astaantan lagu calaamadin karaa.

Ogaysiis: Joogsigu, sidii aad kor ku soo aragteen, kol kasta waxa uu galaa astaanta gudaheeda haddii aannu astaanta hadal ka dambayn. Xattaa haddii uu yahay hal xaraf oo qudh ah, joogsigu waxa uu galaa astaanta gudaheeda. (Tusaale: Raxanweyntu ma karaan xarafka "X.")

T.A.: Dad aad u badani Jamhuuriyadda Soomaalilaan waxa ay u yaqaannaan "Jamhuuriyadda Jeegaanta."

Waxa aan astaantan ku calaamadiyay magac la beddelay. Wax wal ba oo la beddelo, ujeeddo kasta ba ha loo beddelo e, ayaa astaantan lagu calaamadin karaa.

T.A.: Erayga "abwaan" waa mid ka mid ah erayada dadkeennu si khaldan u adeegsadaan.

Waxa aan astaantan ku calaamadiyay eray aan durayo isticmaalkiisa. Wax wal ba oo la durayo, si kasta ba ha loo duro e, ayaa astaantan lagu calaamadin karaa.

T.A.: Weedha "waa aad mahadsan tahay" haddii aan is barno, waa mid sababi karta in aan is jeclaanno yar iyo weyn ba.

Waxa aan astaantan ku calaamadiyay weedh aan sheegayo (aan ku nuuxnuuxsanayo) muhiimaddeeda. Wax kasta oo la sheegayo ama se la caddaynayo muhiimaddooda, muhiimaddu wax kasta ba ha noqoto e, ayaa astaantan lagu calaamadin karaa.

T.A.: "Huyun," waa geed dheer oo aan aslan ba lahayn qodax, kaa oo leh xabag fiican oo la cuno, qoryihiisa na weelasha iyo guud ahaan agabka la isticmaalo looga sameeyo siddo adag.

Ogaysiis: Hakadku kol kasta waxa uu galaa astaanta gudaheeda haddii astaantaasi hadal ka dambeeyo.

Waxa aan astaantan ku calaamadiyay eray aan qeexayay macnihiisa. Wax wal ba oo la qeexayo, si kasta ba ha loo qeexo e, ayaa astaantan lagu calaamadin karaa.

. . .

Qormadan wacan waxa aan ku soo gebagebaynayaa hal arrin oo muhiim ah.

Arrinta kowaad: Waqtiyada qaar waxaa dhacda marka aad wax soo xiganayso, hadalkii aad soo xiganaysay in ay xigasho kale soo dhex gasho. Sidee ayaa, hadda ba, labada xigasho loo kala basrin karaa? Xigashada hore waxa aad u adeegsataa labo guntimood (“ “), xigashada dambe na labo hamse (‘ ‘).

T.A.: Cusmaan waxa uu igu yidhi, “Aabbahay aad baa aan u jecel ahay. Maalintii igu dambaysay araggiisa waxa uu i yidhi, ‘Aabbe, waxbarashada ku dedaal, oo asaagaa ka fiicnow.’”

Ma arkaysaa? Hadalkii Cusmaan waxa aan ku xidhay oo ku xifdiyay labo guntimood (“ “). Cusmaan hadalkii uu ka soo xigtay aabbihii na waxa aan ku xidhay oo ku xifdiyay labo hamse (‘ ‘). Sidaa ayaa aan u kala basriyay. Waa labo xigasho oo is dhex galay!

. . .

Waxa aan, jaalle, eegga xusuustay qormadani in ay tahay qormadii ugu dambaysay qormooyinkii aan kaga hadlayay astaamaha qoraalka, ee mid kasta oo ka mid ah na aan qormo gaar ah ku sharxayay. Waxa aan ku faraxsan ahay codsigiinnii wacnaa in aan aqbalay iyo, dedaal aan sameeyay anigu, in aan idin ku jalbeebay qormooyin dhaxalgal ah oo si hagaagsan idiin fahamsiinaya calaamad kasta iyo isticmaalkeeda saxsan. Waa waajib aan isku lee nahay oo anigu ku ma mahadsani. Wax se idin ka codsanayaa qormooyinkaa in aad marka kowaad kaydsataan iyo, in aad marka labaad, marar badan oo kala duwan akhris fiican kaga bogataan.

Mahadsanidiin, jaallayaal.

. . .



Qoraha: Shaqal bilahaan. Maxamed Siciid “Samiik”